XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

DOWLADDA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

WARBIXINTA BAARISTA SANNADLAHA AH EE SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISEMBAR 2025

DOWLADDA JUBBALAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

دولة جوبالاند الصومالية
مكتب المراجع العام

OFFICE OF THE AUDITOR GENERAL
JUBBALAND STATE OF SOMALIA

Tix: OAG/JSS- 243/202 **Taariikhda: 27/08/2026**

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowladda Jubbaland ee Soomaaliya,

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la raacayo qaybta 32(3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM) ee 2017 iyo qaybaha 30aad, 32aad iyo 33aad ee Xeerka Hantidhowrka/Baarista ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS), waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo warbixinteyda ku saabsan xisaabaha Dowladda Jubbaland ee Soomaaliya ee sannad maaliyadeedkii dhammaadey 31ka Disembar, 2025, si loo horgeeyo Baarlamaanka Dowladdaa.

Warbixinta ayaa waxaa loo diyaariyey si waafaqsan dastuurka iyo waajibaadka sharci ee Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Jubbaland, si loo baaro oo hubin madax-bannaan loogu sameeyo maareynta kheyraadka dowladda/dadweynaha. Hadafka baaristan laga leeyahay waa in kor loo qaado oo la sii wanaajiyo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo dowlad/maamul wanaagga ee adeegsiga hantida ama maaliyadaha dowladda.

Waxaan si ixtiraam leh halkan ugu soo gudbinayaa warbixintan Xubnaha Sharafta Leh ee Baarlamaanka Dowlad-Goboleedka si ay u eegaan una qaadaan tallaabooyin dheeraad ah, iyada oo la raacayo doorka kormeerka iyo la-socoshada ee Hay'adda Sharci-dejinta loo igmaday.

Warbixintan waxaa la socda dokumentiyadan;

1. Warbixinta hanti-dhowraha ee ku saabsan Bayaanka Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) Sannad Maaliyadeedkii (FY) 2025 yo Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee 2014.

2. Warqadda maamulka faahfaahsan ee ka soo baxday baaristeyda.

Mahadsanid,

Mudane Bashiir Maxamed Bahaale,

Hantidhowraha Guud,

Dowladda Jubbaland ee Soomaaliya

EREYADA LA ISKU GAABIYEY

Ereyada la isku gaabiyay	Ereyada oo Kaamil ah
CSC	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
FMIS	Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda
FGS	Dowladda Federaalka ee Soomaaliya
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare
ISAI	Hay'adda Hantidhowrka Sare ee Caalamiga ah
JSS	Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
MoE	Wasaaradda Waxbarashada
MoF	Wasaaradda Maaliyadda
MOIS	Wasaaradda Amniga Gudaha
MOHDAM	Wasaaradda Gaargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PV	Fawjarka Lacag-bixinta
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
RV	Fawjarka Dakhliga
SERP	Mashruuc Xoojinta Nidaamka Maamulka Guud Ee Maaliyadda Soomaaliya
TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
USD	Doolarka Mareykanka
XHG	Xafiiska Hantidhowrka Guud

TUSMADA WARBIXINTA

1.0 GOGOLDHIG

Sannad kasta, Xafiiska Hantidhowrka Gunud (OAG ee Dowalad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS), waxaa uu baaritaan sharci ah ku sameeyaa xisaabaha guud ee dowlad-goboleedda. Baaritaanadu waxaa ay si joogto ah u muujiyeen meelaha u baahan horumarin, waxaanna la bixiyay soojeedimo la sameyn karo si wax looga qabto arrimaha la tilmaamay.

Soojeedimada am talooyinka la soo-jeediyo waa qayb muhiim ah oo ka mid ah warbixinnada baaristeyda. In la hirgeliyo waa muhiim si loo sii wanaajiyo oo loo dardargeliyo bixinta barnaamijyada iyo adeegyada kharash ahaanta taabogalka ah ee loogu talagalay muwaadiniinta ku nool Dowladdaa Jubbaland ee Soomaaliya.Iyadoo qeyb ka ah shaqadeyda, ayaa waxaan xaqiijiyaa in aan dabagal ku sameeyo talooyinkii lagu soo-jeediyay baaristii hore si kuwa ka mas'uulka ah ay u qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo talooyinkii aan soo-jeediyay.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa waxaa si adag uga go'an in uu taageero horumarinta hannaanka xakameynta iyo maareynta maaliyadaha ee wanaagsan. Waxaan sii wadi doonnaa in aan si firfircoon uga qaybqaato oo aan sii bixiyo aragtiyada sii saadaalinaya sababaha keenaya liidashooyinka nidaamyada kontaroolka gudaha.

Waxaan sidoo kale doonayaa in aan halkan ugu mahadceliyo saaxiibada/bah-wadaagta aan taageerada ka helno, gaar ahaan kooxda EU-SFA, oo aan taageero farsamo ka helnay intii ay baaristan socotay.Waxaan si kal iyo laab ah ugu mahadnaqayaa dhammaan hawlwadeennada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowldda Jubbaland ee Soomaaliya (JSS-OAG) oo si joogto ah ugu heellan waajibaadkooda iyo masuuliyadooda, iyagoo ku shaqeeya duruufo kasta oo adag.

2.0 DOORKA XAFIISKA HANTIDHOWKA GUUD (OAG)

Mas’uulka Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ahaan, waajibaadkeyga dastuuriga ah waa xaqiijinta in maaliyadaha dowladda si sharci ah oo wax-ku-ool ah loogu isticmaalo adeeg bixinta. Taa macnaheedu waa in xafiiskeennu uu yahay hay'ad u madax-bannaan ilaalinta maaliyadaha dowladda iyo amniga dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka Jubbaland, sida ku caad Qodobbada 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubbaland iyo Qodobka 7aad ee Xeerka Hantidhowrka JSS ee 2016Waxaan baaris ku sameeyaa oo aan ka soo warbixinaa maareynta maaliyadaha ay Dowladdu heshay, ha ahaato mid laga helay canshuur-bixiyeyaasha, deeq-bixiyeyaasha ama meelo kale, iyo hubinta in kharashaadka loo maareeyo hab daahfuran, anshax iyo xirfadlenimo ku dheehan. Sidoo kale, waxaan xaqiijiyaa in si macquulka ah ay dowladda u adeegsato lacagaha dadweynaha, oo ah habka uu ansixiyey Baarlamaanka, iyadoo loo marayo baaritaanno xirfadeed madax-bannaan. Waxaan daraaseeyaa sida iyo haddii maaliyadahan ay si cad oo sax ah ay uga soo warbixisay Dowladda iyo sida loo adeegsaday marka loo eego dhaqaalaha, hufnaanta iyo taabogalnimada.Markaasi ka-dib, waxaan ku daabacaa warbixinta baarista baraha internetka (mareegtooynka) rasmiga ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG), waxaanna marka hore nuqul warbixinta baarista ah u geeyaa Baarlamaanka, iyadoo hal bil gudaheeda marka warbixinta la dhammeystiro, ay sidoo kale helaan muwaadiniinta u dhashey Dowlad-goboleedka Jubbaland iyo daneeyayaasha kale, iyadoo la raacayo Qaybta 32(3 iyo 4) ee Xeerka PFM ee 2017. Intaa waxaa dheer, in dhammaan warbixinnadeyda ay dadweynuhu ka heli karaan mareegtada ama bogga internetka OAG Gaar ahaan, Qaybta 30(6) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2016 ayaa uga baahan hantidhowraha Guud (AG) in uu warbixintiisa ku soo daro:

- Aragtida dhabta ah ee miisaaman ee xisaabaadka dowladda ee isku-dhafan iyo kuwa kala-soocan;
- Waxyaabihii la ogaaday ee mugga lahaa iyo soojeedimada;
- Nusqaamaha ama khaladaadka laga helay nidaamka kantaroolka gudaha;
- Faahfaahinta diiwaannada muhiimka ah ee aan gacanta lagu hayn; iyo
- Lacago kastoo la bixiyay iyada oo aan la tixgelin xaaladda dhaqaale ama waxtarkooda

2.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna

Qaybta 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ayaa wuxuu qeexayaa mas’uuliyadda xafiiska hantidhowrka guud (OAG) uu ka saaran yahay in uu baaritaan ku sameeyo xisaabaadka dhammaan hay’adaha guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS). Iyada oo la raacayo qodobbada Qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016, Hantidhowraha Guud waa in uu u soo gudbiyaa warbixinta Baarista Sanadlaha ah Baarlamaanka afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaannada Maaliyadeed ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Barlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka ee Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016.

Madax-bannaanida Hantidhowraha Guud waa astaanta koowaad ama aasaasiga ah ee ay leedahay Hay’adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee si fiican u shaqeynaysa oo u hawlgasha si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hanti-dhowrka Sare (International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs). Qaybaha 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubbaland waxay dhigayaan in OAG uu yahay hay'ad madax-bannaan shaqadiisa ugu weynna ay tahay in uu noqdo hantidhowraha dibedda ee Dowlad-goboleedda. Intaa waxaa dheer, Qaybta 7(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in ay si gaar ah ula xiriirto Hantidhowraha-Guud in uu u madax-bannaan yahay gudashada mas'uuliyadiiisa

2.2 Horumarka Ilaa iyo Hadda La Gaarey

Horumar ayaa waxaa laga gaarey dhisidda kartida shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG). Xawaaraha ay ku socotay karti ku biirrinta ayaa hoos u dhac ku yimid; in kastoo ay dib u dhacyadan jiraan, haddana xafiiska wuxuu awooday in uu soosaaro warbixinnada sannadlaha ah ee OAG ee 2022, 2023, 2024 iyo 2025 iyadoo taageero laga helayo la-taliyayaasha EU-SFA

2.3 Caqabadaha Horyaalla OAG JSS

Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa isku-dayaya in uu helo hawlwadeenno hantidhowrka u sameeyo oo xirfadoodu aad u sarreyso kuwaas oo gudan kara waajibaadka sharci ee xafiiska iyagoo haysta taageero yar. Si shuruudan loo buuxiyo, kheyraadyada ku habboon waa in la bixiyaa si loo haqabtiro baahiyada tababarka iyo hawlgalka ee xafiiska.Haseyeeshee, taageerada laga helo deeq-bixiyayaasha kuma filna in lagu kaabo dhammaan hawlaha u qorsheysan, sidaa daraadeedna, dedaallo badan ayaa gaabis ku yimid. Xafiiska wuxuu weli wajahayaa caqabado dhowr ah, oo ay ka mid yihiin qoondada miisaaniyadda Dowladda u qoondeysay oo aan ku filnayn, taas oo xaddidaysa awoodda maalgelinta hawlgallada baarista muhiimka ah, iyo in uu si weyn ugu tiirsan yahay taageerada uu ka helo deeq-bixiyayaasha oo badanaa ah mid mashruuc ku saleyan oo aan la joogteyn karin si loo helo xoojin hay'adeed muddo-dheer ah.

Waxaa sidoo kale jirta tiro yaraanta xirfadlayaasha baarista/hantidhowrka sameeya oo khibrad iyo aqoon sare leh, waxaanna aad u kooban fursadaha horumarinta xirfadeed iyo qaadashada shahaadooyinka xirfadeed. Shaqaalaha ayaa shaqada si joogto ah uga tagaya sababo la xiriira mushahaar iyo dhiirrigelin lacageed oo aan soo jiidasho lahayn marka loo eego kuwa ay bixiyaan hay'adaha kale. Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa taageero ka raadinaya dowlad-goboleedka si loo xoojiyo hay'adda, taas oo udub dhexaad u ah hubinta in maaliyadda dowladda la ilaaliyo.

Intaa waxaa dheer, Xafiisku wuxuu haystaa qalabka baarista casriga ah oo xaddidan, nidaamyada ICT-ga, iyo kuwa xogta lagu falanqeeyo, iyadoo sidoo kale ay jirto taageerada loojiistiga oo yar, sida gaadiidka iyo kheyraadyada gudaha, taas oo carqaladeysa in baaris wax ku ool ah laga sameeyo dhammaan gobollada.Sidoo kale, xarumaha iyo kaabayaasha xafiiska dad kuma filna, xafiiska oo aan u madax-bannaanayn qoondeynta kheyraadka, ayaa weli saameynaysa hirgelinta hawlo baariseed hufan oo waqtigii loo baahnaa la sameeyo

3.0 HORDHAC

Warbixinta maaliyadeed ee Dowladda Jubbaland ee sannad-maaliyadeedka 2025 waxay muujinaysaa dakhli guud oo dhan USD 69,816,056 iyo kharash guud oo dhan USD 68,426,851. Dakhliga gudaha, oo ka kooban canshuuraha iyo dakhliga kale ee gudaha, wuxuu ahaa USD 36,724,012, halka deeqaha ka imadhe dowladda federalka ee soomaliya ay aheed USD 26,296,290, iyo deeqaha hay'adaha caalamiga ah ayagana garaaye USD 6,795,754.

Dhinaca kharashaadka, 86.8% waxaa lagu bixiyey kharashaadka joogtada ah oo gaaraya USD 59,389,596, halka USD 4,627,130 lagu bixiyey hantida raasumaalka ah iyo USD 4,356,825 lagu bixiyey dib-u-bixinta deymaha dowladda.

Marka la barbar dhigo sannadkii 2024, dakhliga JSS wuxuu kordhay qiyaastii 59.6%, halka kharashaadkuna kordhay qiyaastii 53.3%. Dakhliga canshuuraha wuxuu kordhay ilaa USD 27,470,471, halka deeqaha guud ay gaareen USD 33,092,044, taasoo muujinaysa in deeqaha iyo dakhliga gudaha ay yihiin ilaha ugu muhiimsan ee maalgelinta hawlaha Dowladda Jubbaland.

Guud ahaan, natiijooyinka maaliyadeed waxay muujinayaan koror muuqda oo ku yimid dakhliga iyo kharashaadka Dowladda Jubbaland sannadka 2025. Si kastaba ha ahaatee, baaristu waxay sidoo kale aqoonsatay khaladdadka uhiim ah oo la xiriira dukumentiyada dakhliga iyo kharashaadka, wax-soo-iibsiga iyo qandaraasyada, maareynta kharashaadka ciidamada, maareynta bangiyada iyo is-waafajinta akoonnada, maamulka deeqaha, shaqada Hantidhowrka Gudaha iyo Macluumaadka Tiknoolajiyadda iyo Isgaarsiinta (ICT), kuwaas oo u baahan tallaabooyin sixitaan oo ku habboon.



4.0 NUXURKA KOOBAN EE WARBIXINTA

Waxaan baaris ku sameeyey xisaabaadka guud ee dowladda jubbaland soomaaliya ee sanad maaliyaadeedka ku dhammaaday 31ka diseembar 2025, si waafaqsan Heerarka caalimga aah ee Hay'ada sare ee Hantidhawrka (ISSA), Sharciga hantidhawrka iyo sharica maamulaka maaliyadda dadweynaha ee (PFM) ee dowladda Jubbaland.

Bayaannada maaliyadeed waxay muujiyeen dakhli guud oo gaaraya $69,816,056 iyo kharashaad guud oo gaaraya $68,426,851. Baaristeyda waxaa ay muujisay liidashooyin ka jira maareynta dakhliga, xakameynta kharashka, mareynta dheymaha iyo hab-dhaqannada wax-soo-iibsiga.

Markii aan dhammaystiray habraacyadii baarista,kuwaas oo noqnaya gundiga aragtida waxaan soo saaray **Aragti Cilladaysan (Qualified Opinion)** oo ku saabsan Warbixinta Maaliyadeed ee Dowladda.

Aragtidani waxay ku salaysan tahay lix arrimood oo muhiim ah oo saamayn ku leh isku hallaynta Warbixinta Maaliyadeed, kuwaas oo khuseeya dhakliga iyo kharashdka dowladda.

a) Baarista waxaa ay muujisay **USD 3,546,458.26** ee dakhliga oo aan si buuxda loo cadeynin, maadaama dokumentiyada muhiimka ah sida warqadaha dhigaalka bankiga iyo faahfaahinta aqoonsiga canshuur-bixiyaha iyo maanafeestada ay maqnaayeen. Intaa waxaa dheer, in **USD 829,638.47** aan gebi ahaanba la taageerin, oo ma lahan wax dokumentiyo ah oo caddeyn u ah

b) Dhanka kharashadka baristu waxan ku ogaady Kharashaad gaaraya **USD 4,138,155.61** oo lahayn cadeymo dhameystiran. Dukumentiyada XHG loo soo bandhigay waxay inta badan ahaayeen dukumentiyo gudaha ee wasaradda laga diyaariye sida foomka lacag-bixinta, jeega bangiga, iyo jeega system-ka ee BISAN, taas na maahaan caddeyn kufilaan lacaag bixinta.

c) Sidoo kale baarista waxaan ku ogaaday in dowladda Jubbaland sannadkii 2025 bixisay kharashaad la xiriira amniga oo dhan **USD 18,658,336**, marka loo eego USD 7,504,650 oo la bixiyey sannadkii 2024. Tani waxay ka dhigan tahay koror dhan USD 11,153,686 (149%) muddo hal sano ah wasaaraddana kama bixinin sharaaxad lagu qanco.inta waxaa dheer wax dokument oo caddeymo ee bixinta musharadka ciidamadho XHG loma so bandigin inta baristu socote

d) Dhanka deeqaha, waxaan kaloo ogaaday lacagaha deeqaha dibadada iyo dowladda federalka oo gaaraya **USD 26,288,790.06** ayaa loo waayay heshiisyo iyo xaqiijinda deeq bixiyayaasha.

e) Dhanka kale Hab Maamulka deymaha ayaa ah mid liitay, deyn dhan **USD 3,329,536** ayaa la amaahday, waxana la bixiyeey amaah dhan **USD 3,919,768** isla sanad maaliyaddedka iyada oo aan loo haynin oggolaansho Baarlamaan, warbixinada deymaha aan la soo gudbin, heshiisyadii amaahda oo aan la saxiixin, isla markaana aan jirin istiraatiijiyad hagaysa maamulka deymaha.

f) Baaristu waxaan ku ogaannay in habka wax-soo-iibsiga usaan buuxinin shuruudihii wax iibsiga ee Habka Qiime-sheegashada (Shopping) ama habka xayasiinta, balse inta badhan lagu fuliyey habka Hal Meel wax-ka-iibsiga (Single Sourcing), iyadoo aan la hayn dukumentiyo iyo sharraxaad ku filan oo sababaynaya adeegsiga habkaas. Si lamid aah Intii lagu jiray baarista, waxaan ogaannay in Dowladda Jubbaland aysan sannad-maaliyadeedkii 2025 lahayn Guddi Wax-soo-iibsi oo si rasmi ah oo shaqaynaya.

Waxaa xusid mudan in qaar ka mid ah cilladaha lagu ogaaday sannadkan ay yihiin arrimo hore loogu soo sheegay warbixinnadii hantidhawrka ee sannadihii hore, balse aan weli si buuxda wax looga qaban.

Waxaan rajaynayaa in warbixintani ay ka caawin doonto Golaha Wakiillada Dowladda Jubbaland iyo dhammaan hay’adaha ay khusayso xoojinta isla xisaabtanka, daahfurnaanta iyo maamulka wanaagsan ee khayraadka Dowladda jubbaland ee soomaaliya.



5.0 ARAGTIDA HANTIDHOWRKA

5.1 Aragti Cillad Leh (Qualified Opinion)

Waxa aan baaris ku sameyey Warbixinta Maaliyadeed ee Dowlada jubbaland somaliaya oo ka kooban muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka, muuqaalka isbarbardhigga ku-talagalka miisaaniyadda iyo kharashka dhabta ah, iyo xog kooban oo ku saabsan siyaasadaha muhiimka ah iyo sharraxaadda macluumaadka kale ee warbixinta ee dowladda Jubbaland ee soomaaliya sida ku xusan qodobka 32 ee Sharciga Maareynta Maaliyadda dadweynaha ee jubbaland Lr., 2017. Warbixinta waxaan la diyaariyey iyadoo loo raacayo Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladdaha (IPSAS) ee lacagaha caddaan-ka ah.

Sida aan aaminsannahay, intii karaankeyga ah waxa aan heley dhammaan xogtii iyo sharraxaaddii muhiimka u ahaa baarista

Aragtideyda, marka laga reebo saamaynta arrimaha looga hadlay gundhigga Aragtida Cil-ladda leh ee ku xusan warbixinteena, Warbixin Maaliyadeedka sannadlaha ah ee dolwadda jubbalandee soomaaliya waa mid xaqiiqda ku salaysan oo si xaq-soor leh loo soo bandhigay dhammaan waxyaabaha halbeegga leh ee saamaynaya sida; muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka,muuqaalka isbarbardhigga kutalagalka miisaaniyadda iyo kharashka dhabta ah ee sannadka dhammaaday 31da December 2025 iyada oo la isticmaalay Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS) ee lacagaha caddaanka ah iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

5.2 Gundhigga Aragtida Cilladda Leh (Basis for Qualified Opinion)

Waxa aan baaristan u sameeyey si waafaqsan Heerka Hay'adaha Caalamiga ah ee Hantidhawrka ee ISSAI mas'uuliyadeyda la xiriirta heerkan caalamiga ah waxa uu faahfaahin dheerayaa looga bixiyay qaybta mas'uuliyadda Hantidhawrka ee baarista warbixinnada maaliyadeed ee ku xusan warbixinteeyda, si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xeerka Anshaxa ee Hay'adaha Hantidhawradda iyo shuruudaha anshaxe ed ee khuseeya baaristeeyda kuna aadan warbixinta maaliyadeed ee Dowladda jubbaland ee soomaaliya, iyo in aan buuxinay mas'uuliyadeena kale ee anshaxeed. waa ka madax bannaanaanahay hay'adda soo diyaarisay warbixinta maaliyadeed, waxa aan aaminsannahay in caddeymahan aan baarista ku helnay ay ku habboon yihiin kuna filan yihiin in aan ku gaarno gunaanadka Aragtida Hantidhawriseed ee aan bixinnay

Kharashaadka	Lacagtii la baaray, **USD 4,138,155.61** oo kamid ah kharashaadka ma lahayn cadeymo dhameystiran, Dukumentiyada XHG loo soo bandhigay waxay inta badan ahaayeen, dukumentiyo gudaha ee wasaradda laga diyaariye sida foomka lacag-bixinta, jeega bangiga iyo jeega systemka ee BISAN, taas na maahaan caddeyn kufilaan lacaag bixinta.
Dakliga Gudaha	lacag dhan **USD 3,546,458.26** Maleheen cadeeymo dhameystiran, Caddeymaha loo soo bandhigay baarayaasha waxay inta badan ku koobnaayeen dukumentiyo gudaha hay'adda laga diyaariyey, sidha raasidada laga dabaaco BISAN/revenue systemka oo kali, iyadoo aan la soo bandhigin dukumentiyo muhiim ah oo ay ka mid yihiin warqadaha caddeynta dhigaalka lacagta (deposit slips), faahfaahinta aqoonsiga canshuur-bixiyeyaasha iyo warqadda maanafeestada. Intaa waxaa dheer, Si laamid aah Lacag dhan **USD 829,638.47** ayaa lagu ogaaday inaysan lahayn wax dukumenti oo caddeyn ah.
Mamulka Deeqaha Dowladda	Deeqo dhan **USD 26,288,790.06** ma lahayn caddeymo sidha heshiisyadii deeqaha ee khuseeyey, heshiisyada is afgraadka aah, ama dukumentiyo kale oo ku habboon oo taageeraya, kuwaas oo caddeynaya isha deeqda, caddadkeeda, shuruudaheeda iyo

	qawaaniinteeda. Sidoo kale, waxaan ka codsannay Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo deeq-bixiyeyaasha ay khusayso inay xaqiijiyaan deeqaha la helay; hase yeeshee, xaqiijintii la codsaday lama soo gudbin si loogu sameeyo hubinta baaritaanka.
Mamulka Deymaha	Hab Maamulka deymaha ayaa ah mid liitay, deyn dhan **USD 3,329,536** ayaa la amaahday, waxana la bixiyeey amaah dhan **USD 3,919,768** isla sanad maaliyaddedka iyada oo aan loo haynin oggolaansho Baarlamaan, warbixinada deymaha aan la soo gudbin, heshiisyadii amaahda oo aan la saxiixin, isla markaana aan jirin istiraatiijiyad hagaysa maamulka deymaha
Wax-soo iibsiga dowlada	Baaristu waxaan ku ogaannay in habka wax-soo-iibsiga usaan buuxinin shuruudihii wax iibsiga ee Habka Qiime-sheegashada (Shopping) ama habka xayasiinta, balse inta badhan lagu fuliyey habka Hal Meel wax-ka-iibsiga (Single Sourcing), iyadoo aan la hayn dukumentiyo iyo sharraxaad ku filan oo sababaynaya adeegsiga habkaas. Si lamid aah Intii lagu jiray baarista, waxaan ogaannay in Dowladda Jubbaland aysan sannad-maaliyadeedkii 2025 lahayn Guddi Wax-soo-iibsi oo si rasmi ah oo shaqaynaya.

6.0 ARRIMAHA BAARISTA MUHIIMKA U AH

Arrimaha baarista muhiimka u ah kuwa marka loo eego go’aankeeyga xirfad iyo aqooneed, aan u aragke in ay muhiim u leeyihiin baarista warbixin maaliyadeedka sannadkan. Si guud ahaaneed arrimahan ayaan diiradda ku saarnay xilligii aan ku gudajirnay baarista warbixinta maaliyadeed, isla markaana aan qayb ka ahayn aragti baariseedkeenna, mana jirto aragti kale oo aan arrintan ka soo saarney. Arrinkasta oo hoos ku xusan waxaa lagu soo bandhigay sharraxaad ku aaddan sida baarista diiradda loogu saaray.

Waxa aan gudanay waajibaadka ku xusan qaybta Masuuliyadda Hantidhawrraha ee warbixintan baarista. Waxa aan baarista u fulinay innaga oo isticmaalayna habraac baariseedka ugu habboon si aan u qiimeeyno khataraha ahmiyadda leh una soo saarno hadii ay jiraan arrimo kale oo ku jira warbixin maaliyadeedka la soo wadaagay Xafiiska Hantidhawrka Guud. Natiijoyinka habraaca baarista, oo ay qeyb ka yihiin habraacyada aan isticmaalnay si aan wax badan uga ogaanno arrimahan hoose, ayaa gundhig u ah in aan soo saarno Aragti baariseedka cilladda leh ah ee ku saabsan Warbixin Maaliyadeedka ku lifaaqan warbixintan.

6.1 Liidashooyin ka jira dakhli ururinta iyo diiwaangelinta:

Dakhliga gudaha: Waxaan oggaadey liidashooyin/habacsanaan kala duwan oo ka jira ururinta, maareynta, iyo diiwaangelinta dakhliyada gudaha ah oo sida soo socota ah;

a) Gaar ahaan, xafiiska hantidhawrka wuxuu ogaaday is-waafaq la'aan ku saabsan ku-dhaqanka xeerarka dakhliga ee badeecadaha isticmaalka iyo Khaatka, Inkastoo heerarkii la ansixiyey ee sannadka 2025 lagu dabaqay xaaladaha qaarkood, haddana xaalado kale waxaa la adeegsaday heerar kala duwan, iyadoo aan si cad loo diiwaangelin ama si ku filan loo taageerin sababta iyo saldhigga loo adeegsaday heerarka kale.

b) Waxa kale oo an oganey khaladdad ka jira rasiidhada, taas oo keentay in ay adkaato in si cad loo ogaado canshuurta laga rabo in la bixiyo, faahfaahinta canshuur-bixiyaha, nooca dakhliga la ururiyey, iyo saldhigga ama cabbirka lagu go'aamiyey heerka canshuurta lagu dabaqayo, iyo xogaha kale ee muhiimka ah ee lagu xisaabinayo lacagta canshuurta.

c) Waxa kale oo jira Is-waafajin la'aan u dhexeysa buugaagta iyo diiwaannada asalka ah ee lagu ururiyo dakhliga, waraaqaha dhigaalka bangiga (deposit slips), diiwaannada bangiyada, iyo nidaamyada lagu diiwaangeliyo dakhliga sida RMS iyo FMIS.

Adeegsiga aan joogtada ahayn ee heerarka dakhliga ee la ansixiyey wuxuu keeni karaa

- In dakhliga Dowladda si ka yar ama si ka badan intii loogu talagalay loo ururiyo. Sidoo kale, isticmaalka rasiidho khaldan ama aan khusayn macaamilada wuxuu kordhinayaa khatarta ah in dakhliga si khaldan loo diiwaangeliyo, dakhli-lumo, isla markaana aan si cad loo xaqiijin karin la-xisaabtanka lacagaha la ururiyey.

Si loga hortaago khladdadkan, Maamulka Dakhliga waa inuu xoojiyaa dukumentiyada iyo xakameeyayaasha xaqiijinta dakhliga, si loo hubiyo in dhammaan dakhliga gudaha ee la ururiyey ay taageerayaan dukumentiyo dhammaystiran oo lagu kalsoonaan karo, isla markaana si buuxda loo raadin karo laga bilaabo xilliga lacagta la ururiyo, dhigaalka bangiga, diiwaannada BISAN, ilaa ugu dambayn warbixinta maaliyadeed

6.2 Habacsanaanta Maareynta Lacagta Caddaanka ah iyo Akoonnada Bangiyada Dowladda

a) Wasaaradda Maaliyadda ma sameyso is-waafajin banki oo maalinle ah ama toddobaadle ah sida uu dhigayo Xeerka PFM, taas oo daciifinaysa kantaroolka maaliyadeed ee muhiimka ah

b) Intii lagu jiray sannadka 2025, Dowladda Jubbaland waxay furtay 18 akoon bangi oo cusub. Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu codsaday caddeyn muujinaysa oggolaanshaha furitaanka akoonnadaas oo qoraal ah, taas oo uu bixiyey Wasiirka ka hor furitaankooda, sida uu dhigayo Qodobka 29(2) iyo (3) ee xeerka PFM. Hase yeeshee, lama soo bandhigin wax caddeyn ah oo muujinaysa in Wasiirku bixiyey oggolaansho qoraal ah ka hor furitaanka mid kasta oo kamid ah 18-ka akoon bangi.

c) Sido kale Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu ogaaday in 13 akoon bangi la xiray intii lagu jiray sannadka 2025. Caddeyn muujinaysa in la raacay habraacii loo baahnaa ee oggolaanshaha xiritaanka akoonnada waxaa la helay 3 akoon oo keliya, halka 10-ka akoon ee kale aan loo helin wax caddeyn ah oo muujinaysa oggolaanshaha xiritaankooda.

Arimha koor ku xusan ey kamid yahin Maqnaanshaha Diiwaan Akoonnada Bangiyada oo dhammaystiran oo si joogto ah loo cusboonaysiiyey wuxuu keeni karaa in Waaxda Khasnaddu aysan haysan diiwaan lagu kalsoonaan karo oo dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan akoonnada bangiyada Dowladda**.** Tani waxay abuureysaa khatar weyn oo ah in akoon bangi la furo, la isticmaalo ama la xiro iyadoo aan loo marin oggolaanshaha iyo kormeerka habboon ee dowladda.

Si looga hortaago halistahan Maamulka waa inuu sameeyaa oo si joogto ah u hayaa Diiwaanka Akoonnada Bangiyada oo dhammaystiran oo casri ah, kaas oo daboolaya dhammaan akoonnada bangiyada Dowladda.

6.3 Liidashooyin ka jira kharashaadka

Kharashaadka dowladda iyo dukumentiyada taageeraya waxay muujisay liidashooyin waaweyn oo ku saabsan saxnaanta iyo dhammaystirnaanta dukumentiyada looga baahan yahay xaqiijinta macaamilada kharashadka.

a) Lacagtii la baaray, **USD 4,138,155.61** oo kamid ah kharashaadka ma lahayn cadeymo dhameystiran, Dukumentiyada XHG loo soo bandhigay waxay inta badan ahaayeen, dukumentiyo gudaha ee wasaradda laga diyaariye sida foomka lacag-bixinta, jeega bangiga iyo jeega systemka ee BISAN, taas na maahaan caddeyn kufilaan lacaag bixinta. Halka dukumentiyo muhiim ah oo taageeraya lacag-bixinta, sida rasiidhada, qaansheegyada (**invoices**), diiwaannada wax-soo-iibinta iyo dukumentiyada kale ee la xiriira lacag-bixinta, aan la soo gudbin.

Maqnaanshaha dukumentiyo taageeraya oo dhammaystiran ama ku filan wuxuu kordhinayaa khatarta ah

- In kharashaadku noqdaan kuwo aan ansax ahayn, aan la oggolaan, ama si khaldan loo diiwaangeliyey, iyo sidoo kale khatarta ah ee si khaldan loo isticmaalo hantida dadweynaha. Waxay sidoo kale xaddidaysaa awoodda Maamulka uu ku muujin karo in kharashaadka loo galay ujeeddooyin sharci ah, si habboon loo oggolaaday, isla markaana lagu taageeray raad-baaris (audit trail) ku filan.

Arrimahani waxey muujinayaan baahida ah in Maamulka xoojiyaa xakameeyayaasha habraaca kharashaadka, isagoo hubinaya in dhammaan lacag-bixinnada lagu taageero dukumentiyo dhammaystiran oo ku habboon ka hor inta aan la oggolaan oo aan lacagta la bixin

6.4 Liidasho ka jirta Dib-u-bixinta deymaha

Warbixinnada maaliyadeed ee sannadka 2025 waxay muujinayaan xaaladda amaahda gudaha ee Dowladda sida soo socota:

- ❖ **USD 3,329,536** oo ah amaah cusub oo dowladda gudaha dalka ka qaadatay sannadka 2025
- ❖ **USD 3,919,768** oo ah lacagihii dowladda dib ugu bixisay amaahdii gudaha intii lagu jiray sannadka 2025 iyo
- ❖ **USD 8,995,963** oo ah haraagga amaahda gudaha ee dowladda weli lagu lahaa dhammaadka sannadka maaliyadeedkii ku dhammaaday 31 Diseembar 2025.

Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu si faahfaahsan u baaray lacag dhan USD 3,062,722, taas oo u dhiganta qiyaastii 78% wadarta dib-u-bixinta amaahda gudaha, iyadoo diiradda la saaray dukumentiyada caddeymaha u aah shuruudaha dib-u-bixinta iyo habraacyada loo maray bixinta amaahdaas.

Lacagtii loo xushay baaritaanka oo ahayd USD 1,396,116.00 ma lahayn dukumentiyo ku filan oo taageeraya. Gaar ahaan, macaamilada dib-u-bixinta amaahda waxaa ka maqnaa dukumentiyo muhiim ah, oo ay ka mid yihiin Dalabaadyada Wax-iibsiga Gudaha (Local Purchase Orders), heshiisyo saxiixan, qaansheegyada alaab-qeybiyeyaasha iyo caddeymaha keenista, helitaanka ama qaybinta badeecadaha ama adeegyada la xiriira.

Waxaa sidoo kale jiray lacag dhan USD 1,421,716 oo ka mid ahayd lacagtii dib-u-bixinta ee la baaray, balse an lo'haynin wax dokumenti oo caddeyn u aah.

Intaa waxaa dheer, USD 3,329,536 oo ah amaahda gudaha ee cusub ee lagu diiwaangeliyey sannadka 2025 ma lahayn dukumentiyo ku filan oo taageeraya. Sidaa darteed, XHG wuxuu awoodi waayey inuu xaqiijiyo isha amaahda, shuruudaheeda, oggolaanshaheeda iyo ujeeddada loo qaatay amaahda cusub.

Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu sidoo kale ogaaday in Wasaaraddu aysan haysan Diiwaan Deyn (Debt Register) oo lagu diiwaangeliyo laguna kormeero amaahda gudaha ee taagan, dib-u-bixinnada, shuruudaha amaahda iyo haraagga deymaha. Sidaa darteed, XHG wuxuu awoodi waayey inuu si madax-bannaan ugu waafajiyo macaamilada amaahda iyo dib-u-bixinnada diiwaan dhammaystiran oo lagu kalsoonaan karo oo muujinaya deynta gudaha ee Dowladda ee weli taagan.

Habacsanaanta la ogaaday waxay abuuri kartaa; In amaahda gudaha iyo dib-u-bixinnada amaahda oo aan la diiwaangelin ama si khaldan loo diiwaangeliyo.iyo In amaahda ay dowladda qaadato aan loo marin oggolaanshihii iyo habraacyadii loo baahnaa.

Sida darteed Maamulka waa inuu: Hayaa Diiwaanka Deynta oo dhammaystiran oo si joogto ah loo cusboonaysiiyey, kaas oo ka kooban dhammaan amaahda gudaha, dib-u-bixinnada, haraagga deymaha iyo shuruudaha amaahda ee looga baahnaa

6.5 Liidasho ka jirta lacag-bixinnada ciidanka amniga.

Dowladda Jubbaland waxay sannadkii 2025 bixisay kharashaad la xiriira amniga oo dhan USD 18,658,336, marka loo eego USD 7,504,650 oo la bixiyey sannadkii 2024. Xafiiska hantidhawrka wuxuu si faahfaahsan u baaray **USD 17,734,366**, taas oo u dhiganta qiyaastii 95% wadarta kharashaadka la xiriira amniga.

Habraacyadii baaritaanka waxaa ka mid ahaa dib-u-eegista dukumentiyada caddeymaha u aah iyo diiwaannada lacag-bixinta, si loo ogaado salka kororka weyn ee kharashaadka iyo in kharashaadkaasi si habboon loo oggolaaday, loogu taageeray dukumentiyo ku filan, isla markaana si sax ah loo diiwaangeliyey.

Gaar ahaan, xafiiska hantidhawrka wuxuu raadiyey caddeymo sharxi kara kororka kharashaadka, oo ay ka mid yihiin qorista shaqaale cusub oo ka tirsan ciidamada ammaanka, isbeddellada heerarka mushaharka ama darajooyinka, wax-ka-beddelka mushaharrada, isbeddellada ku yimid tirada shaqaalaha ama goobaha loo diray, iyo isbeddello kale oo la ansixiyey oo saameynaya kharashaadka shaqaalaha ammaanka.

Hase yeeshee, wax dukumentiyo oo caddeyn ah looma soo bandhigin lacag-bixinnadii mushaharrada ciidamada ammaanka ee loo xushay baaritaanka. Sidaa darteed, xafiiska hantidhawrka wuxuu awoodi waayey inuu xaqiijiyo salka ama sababta keentay kororka **USD 11,153,686** ee kharashaadka la xiriira amniga marka loo eego sannadkii hore.

Sida darteed Maamulka waa inuu hubiyaa in dhammaan lacag-bixinnada mushaharrada ciidamada ammaanka si habboon loo oggolaaday, lagu taageeray dukumentiyo ku filan, isla markaana si joogto ah loogu waafajiyo diiwaannada mushahar-bixinta iyo xisaabaadka ee khuseeya.

Sidoo kale, Maamulka waa inuu hubiyaa in dhammaan isbeddellada ku yimaadda shaqaalaha, darajooyinka, heerarka mushaharka, goobaha loo dirayo shaqaalaha iyo arrimaha kale ee saameeya kharashaadka amniga si habboon loo diiwaangeliyo loona ansixiyo. Koror kasta oo weyn oo sannadba sannadka ka dambeeya ku yimaadda kharashaadka amniga waa in lagu taageeraa dukumentiyo ku filan iyo sharraxaad cad, iyadoo sidoo kale la haysto oggolaanshaha Maamulka ee ku habboon

6.6 Liidasho ka jirta habka wax-soo-iibsiga iyo qandaraasyadda dowladda

Intii lagu guda jiray baarista wax-soo-iibsiga dowladda, Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu ogaaday gaabisyadan hoos ku xusan

a) Baaristu waxaan ku ogaannay in habka wax-soo-iibsiga usaan buuxinin shuruudihii, wax iibsiga ee Habka Qiime-sheegashada (Shopping) ama habka xayasiinta, balse inta badhan lagu fuliyey habka Hal Meel wax-ka-iibsiga (Single Sourcing), iyadoo aan la hayn dukumentiyo iyo sharraxaad ku filan oo sababaynaya adeegsiga habkaas.

b) Baaristii la sameeyay waxay sidoo kale muujisay in macaamilo wax-soo-iibsi oo ay Dowladdu fulisay sannadkii 2025, aysan lahayn dukumentiyo iyo caddeymo ku filan, sida; qiime-soo-jeedinnada, dalabaadka wax-iibsiga (purchase orders), heshiisyada, qaansheegyada (invoices), caddeynta keenista ama helitaanka badeecadaha iyo adeegyada, iyo oggolaanshaha khuseeya kuwaas oo aan dhammaystirnayn ama aan la heli karin qaarkood

c) Intii lagu jiray baarista, waxaan ogaannay in Dowladda Jubbaland aysan sannad-maaliyadeedkii 2025 lahayn Guddi Wax-soo-iibsi oo si rasmi ah oo shaqaynaya.

d) Wasaaraddu ma aysan hayn liis casri ah oo alaab-qeybiyeyaasha iyo iibiyeyaasha hore loo ansixiyey (pre-qualified suppliers/vendors), sida uu dhigayo Siyaasadda Wax-soo-iibsiga dowladda.

e) Wax dukumenti ah oo muujinaya Qorshe Sannadeedka Wax-soo-iibsiga ee 2025 oo la ansixiyey looma soo bandhigin baaritaanka si dib-u-eegis loogu sameeyo

Arimahaan waxey keeni karaan khataro ay ka mid yihiin:

a) U hoggaansanaan la'aanta shuruudaha wax-iibsiga waxay kordhinaysaa khatarta ah in wax-iibsigu noqdo mid aan tartan ku dhisnayn, qiimayaashuna si aan habboonayn u sarreeyaan iyo sidoo kale khiyaano, iskahorimaad dano iyo in dowladda aysan ka helin qiimaha iyo faa'iidada ku habboon lacagta ay bixisay (value for money).
b) Maqnaanshaha dukumiintiyada iyo caddeymaha ku filan wuxuu xaddidayaa awoodda lagu xaqiijin karo in wax-iibsigu ahaa mid sax ah oo la oggolaaday iyo in badeecadihii ama adeegyadii la soo iibiyey dhab ahaan la helay

6.7 Saamiga Dakhliga ee Adeegga Tayo-dhawrka Jubbaland (JQCS) oo aan la Diiwaangelin

Baaritaanku wuxuu ogaaday daciifnimo ka jirta diiwaangelinta, is-waafajinta iyo la-socodka dakhliga ay JQCS u ururiso Dowladda Jubbaland, iyadoo loo marayo heshiiska dheef-wadaagga ee shanta sano ah. JQCS waxay sheegtay in ay sannadkii 2025 ururisay dakhli dhan USD 195,004.30, iyadoo saamiga Dowladda ee 12% uu ahaa USD 23,400.57 bixise. Inkasta oo JQCS ay soo bandhigtay caddeymo muujinaya in lacagaha qaar lagu shubay koontada bangiga Dowladda, lacagahaas lagama helin diiwaannada xisaabeed ee Wasaaradda. Sidaa darteed, Xafiiska Hantidhawraha Guud (XHG) wuxuu awoodi waayey inuu helo caddeymo baaritaan oo ku filan kuna habboon si uu si madax-bannaan ugu xaqiijiyo dhammaystirnaanta iyo saxnaanta saamiga dakhliga Dowladda ee 12%.

Arrinta muhiimka ah: Dakhliga Dowladda ee heshiiska ku waajibay si ku filan looma diiwaangelin, looma waafajin diiwaannada bangiga, mana jirin hannaan ku filan oo lagu xaqiijin karo dhammaystirnaantiisa.

6.8 Dakhliga kirada ee dowladda oo aan laga soo ururin shirkadda Midnimo

Baaritaanku wuxuu ogaaday in Shirkadda Midnimo aysan bixin kiradii billaha ahayd ee USD 500 ee ku xusnayd heshiiska kirada ee ay la gashay Dowladda Jubbaland, kaas oo ku saabsanaa isticmaalka hanti Dowladda leedahay oo loogu talagalay xarun dhallinyaro. Iyadoo lagu salaynayo qiimaha kirada ee heshiiska iyo muddada saddexda sano ah, Dowladda Jubbaland waxay xaq u lahayd dakhli kiradeed oo dhan USD 18,000. Hase yeeshee, XHG ma uusan helin caddeymo muujinaya in kiradaas la ururiyey muddadii baaritaanka.

Arrinta muhiimka ah: Dakhli kiradeed oo dhan USD 18,000 oo Dowladda xaq u lahayd lama soo ururin si waafaqsan shuruudihii heshiiska.

6.9 Habacsanaanta Maareynta Hantida Ma-guurtada ah ee Dowladda

Intii lagu guda jiray baarista, waxaan ogaanay in Wasaaradda Maaliyaddu aysan haysan Diiwaan Hanti (Asset Register) oo dhammaystiran oo la cusboonaysiiyay, kaas oo daboolaya dhammaan hantida dowladda ee ay Wasaaraddu gacanta ku hayso ama maamusho. Maqnaanshaha Diiwaan Hanti oo dhammaystiran ayaa adkeeyay in si sax ah loo ogaado nooca, tirada, qiimaha, goobta, xaaladda iyo cidda mas'uulka ka ah hantida dowladda. Arrintani waxay kordhinaysaa khatarta ah in hantida dowladda ay lunto, si khaldan loo isticmaalo, si aan la oggolayn loo wareejiyo ama loo leexsado. Sidoo kale, waxay adkeynaysaa xaqiijinta jiritaanka iyo dhammaystirka hantida iyo iswaafajinta diiwaannada hantida iyo xogta xisaabaadka iyo dukumentiyada taageeraya.

Arrrimaha kor ku xusaan waxey keenayan khataraha ah;

- In hanti dowladda leedahay ay lunato, si khaldan loo isticmaalo ama laga takhaluso iyadoo aan la haysan oggolaanshaha loo baahan yahay.
- Isla-xisaabtanka iyo la socodka hantida Dowladda oo daciifa, maadaama aan si cad loo hayn xogta ku saabsan hantida Dowladda iyo cidda mas'uulka ka ah.

6.10 Liidasho ka jira Hantidhawrka Gudaha

Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxa uu qiimeeyey shaqada Hantidhawrka Gudaha ee Wasaaradda, dib u eegista Hantidhawrka gudaha ee Wasaaradda aya waxan ku ogaaday arimaha hoos ku xusan:

- Ma jirin Guddi Hantidhawr Gudaha oo loo sameeyey in uu bixiyo kormeer, hagid iyo taageero ku saabsan shaqada Hantidhawrka Gudaha.
- Ma jirin axdi Hantidhawrka Gudaha oo la ansixiyey, kaas oo qeexaya waajibaadka, awoodda, mas'uuliyadaha iyo habka ay warbixinnadu uga soo baxayaan Hantidhawrka Gudaha.
- Ma jirin Qorshe Sannadeedka Shaqada Hantidhawrka Gudaha oo la ansixiyey, kaas oo muujinaya sida hawlaha iyo baaxadda baarista Hantidhawrka Gudaha loo qorsheeyey iyadoo lagu salaynayo halisaha la aqoonsaday.
- Wax warbixinno Hantidhawr Gudaha ah looma soo gudbin XHG sannadka la baarayey, taasoo ka dhigan in Xafiiska Hantidhawrka Guud uusan helin warbixinno ama dukumiinti muujinaya shaqadii Hantidhawrka Gudaha iyo hubintii uu qabtay muddadaas.

Guud ahaan, halisahani waxay muujinayaan in Hantidhawrka Gudaha ee Wasaaraddu uusan ku shaqayn nidaam maamul iyo kormeer oo ku filan, qorshe habboon, dukumiinti iyo warbixinno ku filan, iyo agab ku filan si uu u bixiyo hubin wax-ku-ool ah oo ku saabsan ku filnaanshaha iyo waxtarka nidaamyada xakamaynta gudaha ee Wasaaradda

7.0 DABAGALKA HORE EE TALOOYINKA WARBIXINTA HANTIDHAWRKA IYO XAALADDA FULINTOODA (XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD WASAARADDA MAALIYADDA)

XHG wuu bixiyeey 17 talo sanadkii 2024 hashe yeshe 16 ka mid ah 17-dii talo-bixin ee hantidhawrka bixiyey sannadkii hore ayaan weli la fulin iyadoo la gaaray hantidhawrka Sannad-Maaliyadeedka 2025 (FY2025). Talo-bixinta keliya ee la fuliyey waxay ahayd xaashiyaha xaadirinta shaqada (timesheets) ee macallimiinta iyo shaqaalaha caafimaadka, sida hoos lagu soo koobay.



GEBAGGEBO

Kantaroollada ka jira JSS si weyn uma sii hagaagin sannadihii la soo dhaafay. Meelaha ugu waaweyn ee uu walaacu ka taagan yahay waa dhammeystirnaanta dakhliga, kharashaadka, in aan la fulinin siyaasadda wax-soo-iibsiga, iyo jiritaan la'aanta diiwaanka hantida maguurtada ah. Meelo badan, dowlad-goboleedka waxaa ay leedahay shuruuc faahfaahsan oo cad; haseyeeshee, marar badan shuruudahan sharciga ah lama raaco.

Waxaa loo baahan yahay in si joogto ah loola socdo u hoggaansanaanta habraacyadan kantaroolka aasaasiga ah, iyadoo ay jiraan cawaaqib-xumo ka dhalan karta sharci-jebinta / xad-gudubyada soo noqnoqda.

Kantaroollada gudaha ee lagu xakameeyo dakhli ururinta iyo diiwaangelinta lama hirgelin, iyadoo lacag-bixinnada iyo lacag-qabashada aanan si buuxda loo taageerin. Arrimahan waxay abuuraan shaki weyn oo ku saabsan waxyaabaha lagu shaaciyay bayaannada maaliyadeed. Sidaa daraaddeed, Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) wuxuu soosaarey ra'yi baaris wax-laga-beddelay / wax-lala-harey.

Waxaa loo baahanyahay in la xaqiiijiyo soo xareynta dakhliga shirakadaha lala galay qandraasyada cidiin aan bixinna lala xisaabtamo.

WAAJIBAADKEENNA IYO MADAX-BANNAANIDEENNA

Qaybta 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ayaa wuxuu qeexayaa mas’uuliyadda xafiiska hantidhowrka guud (OAG) uu ka saaran yahay in uu baaritaan ku sameeyo xisaabaadka dhammaan hay’adaha guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS). Iyada oo la raacayo qodobbada Qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016, Hantidhowraha Guud waa in uu u soo gudbiyaa warbixinta Baarista Sanadlaha ah Baarlamaanka afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaannada Maaliyadeed ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Barlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka ee Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016.

Madax-bannaanida Hantidhowraha Guud waa astaanta koowaad ama aasaasiga ah ee ay leedahay Hay’adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee si fiican u shaqeynaysa oo u hawlgasha si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hanti-dhowrka Sare (*International*

Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs). Qaybaha 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubbaland waxay dhigayaan in OAG uu yahay hay'ad madax-bannaan shaqadiisa ugu weynna ay tahay in uu noqdo hantidhowraha dibedda ee Dowlad-goboleedda. Intaa waxaa dheer, Qaybta 7(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in ay si gaar ah ula xiriirto Hantidhowraha-Guud in uu u madax-bannaan yahay gudashada mas'uuliyadiiisa.

HORUMARKA ILAA IYO HADDA LA GAAREY

Horumar ayaa waxaa laga gaarey dhisidda kartida shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG). Xawaaraha ay ku socotay karti ku biirrinta ayaa hoos u dhac ku yimid; in kastoo ay dib u dhacyadan jiraan, haddana xafiiska wuxuu awooday in uu soosaaro warbixinnada sannadlaha ah ee OAG ee 2022, 2023, 2024 iyo 2025 iyadoo taageero laga helayo la-taliyayaasha EU-SFA.

CAQABADAHA HORYAALLA OAG JSS

Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa isku-dayaya in uu helo hawlwadeenno hantidhowrka u sameeyo oo xirfadoodu aad u sarreyso kuwaas oo gudan kara waajibaadka sharci ee xafiiska iyagoo haysta taageero yar. Si shuruudan loo buuxiyo, kheyraadyada ku habboon waa in la bixiyaa si loo haqabtiro baahiyada tababarka iyo hawlgalka ee xafiiska.

Haseyeeshee, taageerada laga helo deeq-bixiyayaasha kuma filna in lagu kaabo dhammaan hawlaha u qorsheysan, sidaa daraadeedna, dedaallo badan ayaa gaabis ku yimid. Xafiiska wuxuu weli wajahayaa caqabado dhowr ah, oo ay ka mid yihiin qoondada miisaaniyadda Dowladda u qoondeysay oo aan ku filnayn, taas oo xaddidaysa awoodda maalgelinta hawlgallada baarista muhiimka ah, iyo in uu si weyn ugu tiirsan yahay taageerada uu ka helo deeq-bixiyayaasha oo badanaa ah mid mashruuc ku saleyan oo aan la joogteyn karin si loo helo xoojin hay'adeed muddo-dheer ah.

Waxaa sidoo kale jirta tiro yaraanta xirfadlayaasha baarista/hantidhowrka sameeya oo khibrad iyo aqoon sare leh, waxaanna aad u kooban fursadaha horumarinta xirfadeed iyo qaadashada shahaadooyinka xirfadeed. Shaqaalaha ayaa shaqada si joogto ah uga tagaya sababo la xiriira mushahaar iyo dhiirrigelin lacageed oo aan soo jiidasho lahayn marka loo eego kuwa ay bixiyaan hay'adaha kale. Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa taageero ka raadinaya dowlad-goboleedka si loo xoojiyo hay'adda, taas oo udub dhexaad u ah hubinta in maaliyadda dowladda la ilaaliyo.

Intaa waxaa dheer, Xafiisku wuxuu haystaa qalabka baarista casriga ah oo xaddidan, nidaamyada ICT-ga, iyo kuwa xogta lagu falanqeeyo, iyadoo sidoo kale ay jirto taageerada loojiistiga oo yar, sida gaadiidka iyo kheyraadyada gudaha, taas oo carqaladeysa in baaris wax ku ool ah laga sameeyo dhammaan gobollada.

Sidoo kale, xarumaha iyo kaabayaasha xafiiska dad kuma filna, xafiiska oo aan u madax-bannaanayn qoondeynta kheyraadka, ayaa weli saameynaysa hirgelinta hawlo baariseed hufan oo waqtigii loo baahnaa la sameeyo.

MAHADNAQ

Xafiiska OAG wuxuu fursaddan ugu faa'iideysanayaa in uu sida ay ugu heellan yihiin shaqadooda ugu mahadceliyo shaqaalaheenna, bah-wadaagta iyo hawlwadeennada, ay ka mid yihiin la-taliyeyaasheenna EU-SFA TA, kuwaas oo waxyaabihii xafiiska AOG ay ku biirriyeen u suurageliyay xafiiska in uu sii wado joogteynta xirfadlenimadiisa. Ugu dambeyn, waxaan u mahad-celineynaa Baarlamaanka, Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, kuwaas oo si uun gacan uga geystay shaqada xafiiska hantidhowrka guud (OAG). Waxaa sharaf weyn inoo ah in aan soo bandhigno Warbixinta Sannadlaha ah ee Hantidhowrka-Guud ee 2025.

Lifaaqa 1aad. Warbixinta hanti-dhowraha ee ku saabsan Bayaanka Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) Sannad Maaliyadeedkii (FY) 2025 iyo Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee 2025.

Lifaaqa 2aad. Warqadda maamulka ee faahfaahsan ee ka soo baxday baaristeyda

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

DOWLADDA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

WARBIXINTA BAARISTA SANNADLAHA AH EE SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISEMBAR 2025

TUSMADA BUUGGA

EREYADA LA SOO GAABIYAY

Ereyada la isku gaabiyay	Ereyada oo Kaamil ah
CSC	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
FMIS	Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda
FGS	Dowladda Federaalka ee Soomaaliya
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hanti-dhowrka Sare
ISAI	Hay'adda Hantidhowrka Sare ee Caalamiga ah
JSS	Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
MoE	Wasaaradda Waxbarashada
MoF	Wasaaradda Maaliyadda
MoH	Wasaaradda Caafimaadka
MOIS	Wasaaradda Amniga Gudaha
MOHDAM	Wasaaradda Gaargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka
OAG	Xafiiska Hantidhowrka Guud
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PV	Fawjarka Lacag-bixinta
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
RV	Fawjarka Dakhliga
SERP	Mashruuc Xoojinta Nidaamka Maamulka Guud Ee Maaliyadda Soomaaliya
TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
USD	Doolarka Mareykanka

WARBIXINTA HANTIDHOWRAHA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN BAYAANNADA MAALIYADEED EE ISKUDHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31-KA DISEMBAR 2025.

Ra'yiga Hantidhowraha Madax-bannaan

Ra'yiga Wax Lala Harey / Wax-laga-beddelay (*qualified Opinion*)

Waxaan baaris ku sameeyay bayaannada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaali, kuwaas oo ka kooban Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha, Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyey iyo Ta Rumooway, Bayaannada Hawlgallada Istaatistika Maaliyadda Dowladda (GFS) ee sannadki dhammaadey 31ka Disembar 2025 iyo Qoraallada La-socda Bayaannada Maaliyadeed, oo ay ku jiraan siyaasadaha xisaabaadka mugga leh oo kooban.

Ra'yigeyga ahaan, marka laga reebo raadadkii ay keenaan waxyaabaha lagu sharxay qaybta Sababaha lagu saleeyey Ra'yiga Wax-lala-harey / Wax-laga-beddelay ee waxbixinteenna, bayaannada maaliyadeed marka dhinac kasta oo muhiim ah laga eego, waxaa ay si quman u soo bandhigayaan xaaladda maaliyadeed ee Dowladda Jubbaland ee Soomaaliya ilaa 31kii Disembar 2025 iyo sida ay ahayd xaaladda maaliyadda ee muddadii waqtigaa ku ekeyd si waafaqsan Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dowladda, ee 2017 iyo Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda / *the International Public-Sector Accounting Standards* (IPSAS) - Warbixinta Maaliyadeed ee ku Saleysan Xisaabaadka Lacagta Kaashka ah ee Financial Reporting Under the Cash Basis of Accounting, 2017

Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Wax Lala Harey/Wax-laga-beddelay

Waxaan aqoonsadey khaladaadkan la taaban karo ee soo socda intii lagu guda jiray baaristii aan u sameeyay si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Sare ee Hantidhowrka / *the International Standards of Supreme Audit Institutions* (ISSAI).

1. Kharashaad dhan ama gaaraya **USD 4,138,155.61** ma lahayn caddeymo muujinaya keenista alaabooyin, shaqo la qabtey, ama adeeg la bixiyay. Sidaa daraaddeed, saxnaanta xisaabahan iyo kala-soocidooda saxda ah lama xaqiijin karo.
2. Baarista waxaan ku ogaanay in dowladda Jubbaland waxay sannadkii 2025 bixisay kharashaad la xiriira amniga oo dhan **USD 18,658,336,** marka loo eego USD 7,504,650 oo la bixiyey sannadkii 2024. Tani waxay ka dhigan tahay koror dhan USD 11,153,686 (149%) muddo hal sano ah wasaaraddana kama bixinin sharaaxad

lagu qanco.

3. Bixinta lacago deymo ah oo oo gaaraya USD 6,122,712 (oo u dhigma 14% ee kharashaadka guud) laguma taageerin fawjarro faahfaahsan ama dokumentiyo asal ah. Sidaa daraaddeed, lama xaqiijin karo in kharashaadkan si dhab ah loo bixiyay, in si sax ah loo diiwaangeliyey, ama in lagu qoray koodhadhka saxda ah ee xisaabaadka.
4. Dakhli guud ahaan gaaraya USD 3,546,458.26 oo u dhigma % ee wadarta dakhliga, ayaa lagu taageeray dokumentiyo aan dhammeystirnayn. Dokumentiyada taageeraya ee aasaasiga ah, sida rasiidyada, warqadaha dhigaalka bankiga, faahfaahinta aqoonsiga canshuur-bixiyaha, manafeestada iyo buugaagta rasiidka, lama bixin.
5. Sidoo kale, lacag cadadkeeda gaaraya USD 829,638.47 dhammaan dakhliga gebi ahaanba ma lahayn dokumentiyo taageeraya. Waxaan baaristeyda u sameeyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare ee loo yaqaanno International Standards for Supreme Audit Institutions (ISSAI).

7.1	U Hoggaansanaan La'aanta Shuruudaha Heshiiska-Shirkadda Adeegga Tayo-dhawrka ee Jubbaland (JCQS)	USD 23,400.57	**Sare**
8.1	U Hoggaansanaan La'aanta Shuruudaha Heshiiska ee shirkadda midnimo	USD 18,000	**Sare**
10.1	Habacsanaanta Maareynta Hantida Ma-guurtada ah ee Dowladda	Lama cabirin	**Sare**
11.1	Gaabisyada ka jira Hantidhawrka Gudaha	Lama cabirin	**Sare**

Heerarka halista

SARE	Arrin leh saameyn maaliyadeed, sharci ama maamul oo weyn; u baahan tallaabo degdeg ah, isla markaana saameyn karta gunaanadka ama aragtida baarista.
DHEXDHEXAAD	Arrin leh khatar muhiim ah oo u baahan qorshe sixitaan iyo dabagal inta lagu jiro sannadka.
HOOSE	Arrin gooni ah ama habraac u baahan hagaajin si loo xoojiyo kontoroollada gudaha iyo maamulka.

NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH EE FAAHFAAHSAN EE BAARITAANKA SANNAD-MAALIYADEEDKA 2025

1.0 Gaabisyada ka jirta Maareynta Dakhliga Gudaha

Natijadda 1.1. Dakhli aan lahayn wax caddayn ah iyo dakhli aan caddayntiisu dhammaystirnayn

Halista	Sare

Halbeegga

Sida ku cad Qodobka 30(7) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) iyo Xeer-hoosdka 10, farqadaha 3.2 iyo 3.3, hay'ad kasta waa inay ilaaliso dukumiintiyada maaliyadeed muddada iyo habka lagu qeexay xeerarka xisaabaadka ee PFM ka

Xaaladda

Sida ku cad warbixinta maaliyadeed ee sannadka ku dhammaaday 31ka Diseembar 2025, wadarta dakhliga gudaha ee la ururiyey waxay ahayd **USD 36,724,012.00**. Dakhligaas wuxuu ka koobnaa canshuuraha dakhliga iyo raasumaalka, canshuuraha mushaharka iyo shaqaalaha, canshuuraha badeecadaha iyo adeegyada, canshuuraha ganacsiga iyo macaamillada caalamiga ah, canshuuraha iibka badeecadaha iyo adeegyada, iyo ganaaxyada iyo ciqaabaha.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHG) wuxuu baaritaan ku sameeyey dakhliga canshuuraha ee dhan **USD 28,410,862.21**, oo u dhiganta qiyaastii **78%** wadarta dakhliga gudaha. Dib-u-eegistu waxay muujisay arrimo la xiriira dhammaystirka dukumentiyada taageeraya qaar ka mid ah macaamillada dakhliga.

Gaar ahaan:

• Lacag dhan **USD 3,546,458.26** waxaa la heli karay dukumentiyada taageeraya ee la xiriira macaamilladaas, oo ay ku jiraan caddeymaha dhigaalka lacagaha (deposit slips), xogta aqoonsiga canshuur-bixiyeyaasha iyo diiwaannada laga raadin karo BISAN/Revenue System. Dukumentiga aan lagu darin faylasha taageeraya wuxuu ahaa manifesta markabka/shixnadda (ship manifest/waybill). Wasaaraddu waxay caddeysay in manifesta uu sannadkan cusub ku soo biiray liiska dukumentiyada taageeraya ee loo baahan yahay in lagu lifaaqo faylasha dakhliga, sidaas darteedna uusan horey uga mid ahayn dukumentiyada khasabka ah ee Wasaaraddu u aqoonsanayd supporting documents-ka dakhliga. Sidoo kale, lacag dhan **USD 829,638.47** ayaa lagu ogaaday in dukumentiyada muhiimka ah ee taageeraya macaamilladaas aysan si buuxda ugu jirin faylasha loo soo bandhigay baaritaanka.
Sidaa darteed, XHG wuxuu tilmaamay in dukumentiyada la heli karay aysan si buuxda u daboolin dhammaan shuruudaha dukumentiyada taageeraya ee loo adeegsaday xaqiijinta dakhliga, gaar ahaan marka laga eego **dhammaystirka raad-raaca dukumentiyada** ee lacagta dhan **USD 4,376,096.73**.
Halista • Caddaymaha taageeraya dakhliga oo aan mararka qaarkood si buuxda ugu jirin faylasha macaamillada waxay kordhin karaan khatarta ah in raad-raaca iyo xaqiijinta dakhliga aysan si buuxda u dhammaystirmin, gaar ahaan marka la isku xiriirinayo lacagta la ururiyey, dhigaalka bangiga, diiwaannada BISAN iyo warbixinta maaliyadeed. Haddii dukumentiyada taageeraya aan si nidaamsan loo kaydin, waxay adkayn kartaa dib-u-eegista, xaqiijinta iyo is-waafajinta dakhliga marka loo baahdo.
Talo soojeedin Maamulka Dakhliga waa inuu sii xoojiyaa habraacyada iyo xakameeyayaasha dukumentiyada taageeraya dakhliga, iyadoo la dejinayo oo si joogto ah loo cusboonaysiinayo checklist cad oo qeexaya dukumentiyada looga baahan yahay nooc kasta oo macaamil dakhli ah. Sidoo kale, waa in la hubiyaa in dukumentiyada khuseeya, oo ay ku jiraan caddeymaha dhigaalka bangiga, xogta canshuur-bixiyaha iyo dukumentiyada kale ee ku habboon macaamilka, si nidaamsan loo kaydiyo, loona hubiyo in raad-raaca dakhliga laga bilaabo ururinta ilaa dhigaalka bangiga, BISAN/Revenue System iyo warbixinta maaliyadeed uu yahay mid dhammaystiran oo si fudud loo xaqiijin karo.

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaaday	
Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

Natijadda 1.2. Gaabisyada ka jira Deeqaha laga Helay Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Deeq-bixiyeyaasha Caalamiga ah.

Halista	Sare

Halbeegga

Qodobka 30-aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) wuxuu si cad u dhigayaa: "Wasiir kasta ama Madaxa hay'ad miisaaniyadeed ama hay'ad kale ayaa mas'uul ka ah diiwaangelinta, kaydinta iyo ilaalinta dhammaan dukumentiyada la xiriira macaamilada maaliyadeed ee dadweynaha, iyadoo loo raacayo habka iyo muddada lagu qeexay xeerarka xisaabaadka."

Sidoo kale, Qodobka 6(1.3) iyo 6(5) wuxuu farayaa mas'uuliyiinta ay khusayso inay:

"Kaydiyaan dhammaan rasiidhada, waraaqaha lacag-bixinta, heshiisyada, waajibaadka maaliyadeed iyo dukumentiyada kale ee loo baahan yahay in la hayo, kuwaas oo caddaynaya ansaxnimada macaamil kasta."

Xaaladda

Sida lagu soo bandhigey warbixinta maaliyadeed ee 2025, Dowlada Jubbaland waxay deeq ka heshey Dowladda federaalka soomaaliya (FGS) iyo hay'addo caalimiga ah taas oo aah Deeq dhaan **$33,092,044**. Si loo xaqiijiyo saxnaanta iyo dhameystirnaanta deeqaha lagu soo bandhigay warbixinta maaliyadeed, saraakiisha XHG aya waxey baarintaan ku sameeyen lacaag dhaan **$ 31,644,701.84,** taas oo u dhiganta qiyaastii **96%** wadarta deeqaha la helay. Sidaa daraadeed waxaan ogaaney arrimahan hoose ku xusan:

- Deeqo dhan **USD 26,288,790.06** ma lahayn caddeymo sidha heshiisyadii deeqaha ee khuseeyey, heshiisyada is afgraadka aah, ama dukumentiyo kale oo ku habboon oo taageeraya, kuwaas oo caddeynaya isha deeqda, caddadkeeda, shuruudaheeda iyo qawaaniinteeda. Sidoo kale, waxaan ka codsannay Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo deeq-bixiyeyaasha ay khusayso inay xaqiijiyaan deeqaha la helay; hase yeeshee, xaqiijintii la codsaday lama soo gudbin si loogu sameeyo hubinta baaritaanka.

Xaaladdaas awgeed, Xafiiska Hanti-dhowrka Guud (XHG) wuxuu awoodi waayey inuu helo caddeymo baaritaan oo ku filan kuna habboon si loo xaqiijiyo ansaxnimada, dhammaystirnaanta iyo saxnaanta dakhliga deeqaha ee dhan **USD 26,288,790.06** ee lagu soo sheegay warbixinnada maaliyadeed.
Halista Maqnaanshaha heshiisyada deeqaha iyo la'aanta xaqiijinta madax-bannaan, waxa ay kordhinayaan khatarta ah in dakhliga deeqaha si khaldan loo aqoonsado, uusan dhammaystirnayn ama si aan sax ahayn loogu soo bandhigo warbixinnada maaliyadeed.
Talo soojeedin • Maamulka waa inuu hubiyaa in dhammaan deeqaha la helo ay leyihiin cadeymo siddha heshiisyo deeq oo la saxiixay, ama dukumiintiyo kale oo caddeyn rasmi ah oo si cad u muujinaya ilaha, wadarta deeqa, shuruudaha iyo xaaladaha deeqaha. • Sidoo kale, maamulka waa inuu ilaaliyo oo si cad u soo bandhigo marka loo baahdo, faylasha deeqaha, isla markaana uu iswaafajiyo deeqaha la helay iyo diiwaannada bangiga, diiwaannada xisaabaadka, iyo warbixinta maaliyadeed.
Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaaday

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

Natiijada 1.3. Cilladaha ka Jira Ku-dhaqanka Heerarka iyo Diiwaangelinta Dakhliga

Halista	Sare

Halbeegga

Xeerka Dakhliga Dowladda Jubbaland, 2025 wuxuu qeexayaa heerarka dakhliga ee lagu dabaqayo, wuxuuna dhigayaa qaab-dhismeedka sharci ee lagu maamulayo qiimeynta, ururinta, dukumentaynta iyo maamulka dakhliga Dowladda. Sidaa darteed, dhammaan dakhliga la ururiyo waa in lagu qiimeeyaa heerarka la ansixiyey, lagu taageeraa rasiidho iyo diiwaanno ku habboon, isla markaana si sax ah loo diiwaangeliyaa.

Sida ku cad Qodobka 4(2) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act), dhammaan dakhliga ay Dowladda hesho ama loogu soo ururiyo magaca Dowladda waa in si buuxda loo xisaabiyaa, laguna shubaa Sanduuqa Mideysan ee Dowladda (Consolidated Fund).

Xaaladda

Intii lagu guda jiray dib-u-eegista dakhliga gudaha, XHG wuxuu ogaaday laba arrimood oo la xiriira ku-dhaqanka heerarka dakhliga iyo dukumentaynta/is-waafajinta diiwaannada dakhliga, sida hoos ku xusan:

1. **Ku-dhaqanka heerka canshuurta Khaatka**

Dib-u-eegistu waxay muujisay in xaaladaha qaarkood heerka canshuurta ee Khaatka aan si isku mid ah loo dabaqin. Heerka lagu ansixiyey Xeerka Dakhliga ee 2025 wuxuu ahaa USD 2.50 halkii kiilo, halka xaaladaha la baaray lagu dabaqay USD 3.50 halkii kiilo.

2. **Dukumentaynta iyo is-waafajinta diiwaannada dakhliga**

Dib-u-eegistu waxay sidoo kale muujisay in qaar ka mid ah rasiidhada iyo diiwaannada dakhliga aysan si buuxda u muujin dhammaan xogta muhiimka ah ee macaamilka, sida nooca dakhliga, xogta canshuur-bixiyaha iyo saldhigga ama cabbirka loo adeegsaday xisaabinta lacagta.

Halista

Adeegsiga aan joogtada ahayn ee heerarka dakhliga ee la ansixiyey wuxuu keeni karaa

- Ku-dhaqanka heerar dakhli oo aan si cad loo waafajin heerarka la ansixiyey wuxuu keeni karaa kala duwanaansho ku yimaada lacagta Dowladda xaqa u leedahay inay ururiso.
- Cilladaha ku jira rasiidhada iyo is-waafajinta diiwaannada waxay adkeyn karaan in si fudud loo raaco loona xaqiijiyo xiriirka u dhexeeya macaamilka dakhliga, lacagta la ururiyey, dhigaalka bangiga iyo diiwaanka maaliyadeed.

Talo soojeedin

- Maamulka waa inuu adkeeyaa xakamaynta ururinta Dakhliga Gudaha, isagoo hubinaya in heerarka sharci ee la ansixiyey si joogto ah loo dabaqo.
- Dakhliga la ururiyo waa in lagu taageeraa rasiidhyo sax ah oo la oggolaaday iyo dukumiinti buuxa oo caddeynaya macaamilka.
- Intaa waxaa dheer, diiwaannada ururinta dakhliga waa in si joogto ah loogu waafajiyo bayaanaada bangiga iyo xogta FMIS/BISAN, si loo xaqiijiyo warbixin maaliyadded oo isku waafaqsan oo hufan

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

2.0 Gaabisyada ka jira Maareynta Kharashaadka

Natiijada 2.1 kharashaadka aan lahay cadeymo dhameystiran

Halista	Sare

Halbeegga

Iyadoo la raacayo xeerarka xisaabaadka ee khuseeya, Wasiir kasta ama Madaxa hay'ad miisaaniyadeed ama hay'ad kale waxaa waajib ku ah inuu kaydiyo oo ilaaliyo dhammaan dukumentiyada la xiriira macaamilada maaliyadeed ee dadweynaha, si waafaqsan Qodobka 30(7) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act).

Sidoo kale, Xeerka 6, Farqadda 1.3(5) wuxuu farayaa nidaamka xisaabaadka iyo warbixinta Dowladda inuu kaydiyo dhammaan rasiidhada, waraaqaha lacag-bixinta, heshiisyada, waajibaadka maaliyadeed iyo dukumentiyada kale ee loo baahan yahay si loo caddeeyo ansaxnimada macaamil kasta.

Sidaa darteed, dhammaan macaamilada kharashaadka Dowladda waa in lagu taageeraa dukumentiyo ku filan oo ku habboon, kuwaas oo caddeynaya ansaxnimada, oggolaanshaha iyo jiritaanka kharashka, isla markaana abuuraya raad-baaris (audit trail) oo ku filan.

Xaaladda

Sida ku cad warbixinnada maaliyadeed ee sannadka ku dhammaaday 31ka Diseembar 2025, wadarta kharashaadku waxay ahayd USD **68,426,851.00**. Baaritaanku wuxuu si faahfaahsan u baaray lacag dhan USD **46,244,596.12**, taas oo u dhiganta qiyaastii 68% wadarta kharashaadka.

Dib-u-eegista dhaqdhaqaaqyada kharashaadka iyo dukumentiyada taageeraya waxay muujisay in qayb ka mid ah dhaqdhaqaaqyada la baaray ay u baahnaayeen dukumentiyo taageeraya oo dheeraad ah si loo dhammaystiro raad-raaca.

Gaar ahaan:

- Lacag dhan **USD 4,138,155.61** waxaa lagu ogaaday in dukumentiyada taageeraya ay **qayb ahaan dhammaystirnayn**. Dukumentiyada la heli karay waxaa ka mid ahaa dukumentiyada gudaha ee la xiriira lacag-bixinta, halka qaar ka mid ah dukumentiyada taageeraya ee dheeraadka ah, sida rasiidhada, qaansheegyada (invoices), diiwaannada wax-soo-iibinta, caddeynta helitaanka badeecadaha ama adeegyada iyo dukumentiyada kale ee khuseeya, aan si buuxda loogu heli karin dhammaan macaamilladaas.
- Sidaa awgeed, XHG wuxuu tilmaamay baahida loo qabo in la sii xoojiyo dukumentiyada taageeraya iyo raad-raaca macaamilada kharashaadka, gaar ahaan lacagta **USD**

4,138,155.61 ee dukumentiyadeedu qayb ahaan dhammaystirnaayeen.

Halista

Maqnaanshaha dukumentiyo taageeraya oo dhammaystiran ama ku filan wuxuu kordhinayaa khatarta ah

- Dukumentiyada taageeraya oo aan mararka qaarkood si buuxda u dhammaystirnayn waxay adkeyn karaan xaqiijinta iyo raad-raaca macaamilada kharashaadka.
- Arrintani waxay sidoo kale xaddidi kartaa awoodda Maamulka iyo Hantidhawrka ee lagu xaqiijinayo in dhammaan macaamilada kharashaadka ay leeyihiin dukumentiyo ku filan oo muujinaya oggolaanshaha, ujeeddada iyo helitaanka badeecadda ama adeegga.

Haddii aan si joogto ah loo xoojin nidaamka dukumentaynta, waxay saameyn ku yeelan kartaa hufnaanta iyo isku-halaynta xogta kharashaadka lagu soo bandhigo warbixinnada maaliyadeed.

Talo soojeedin

- Maamulka waa inuu xoojiyaa xakameeyayaasha habraaca kharashaadka, isagoo hubinaya in dhammaan lacag-bixinnada lagu taageero dukumentiyo dhammaystiran oo ku habboon ka hor inta aan la oggolaan oo aan lacagta la bixin.
- Dukumentiyada taageeraya ee loo baahan yahay, oo ay ka mid yihiin qaansheegyada (invoices), rasiidhada, heshiisyada, diiwaannada wax-soo-iibinta, caddeynta in badeecadaha ama adeegyada la helay, oggolaanshaha iyo dukumentiyada kale ee khuseeya, waa in macaamil kasta loo kaydiyaa si waafaqsan shuruudaha Xeerka PFM iyo xeerarka khuseeya

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas’uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

4.0 Habacsanaanta ka jira lacagta caddaanka ah iyo Akoonnada bangiyada

4.1 Habacsanaanta Diiwaanka Akoonnada Bangiyada iyo Dib-u-eegista Sannadlaha ah.

Halista	**Sare**

Halbeegga

Xeerka 5aad, farqaddiisa 3.1 ee Xeerarka Bangiyada ee PFM wuxuu farayaa Waaxda Khasnadda (Treasury Department) inay dejiso oo ay si joogto ah u hayso Diiwaanka Akoonnada Bangiyada, kaas oo ka kooban faahfaahinta dhammaan akoonnada bangiyada ee ay Dowladda samaysatay oo ay maamusho.

Diiwaanka Akoonnada Bangiyadu waa inuu ka koobnaadaa xog dhammaystiran oo casri ah oo ku saabsan dhammaan akoonnada bangiyada Dowladda, isla markaana uu bixiyaa diiwaan dhammaystiran oo ku saabsan akoonnada ay Dowladda samaysatay, hayso oo maamusho.

Xaaladda

Intii lagu guda jiray dib-u-eegista maareynta lacagta caddaanka ah iyo akoonnada bangiyada, XHG wuxuu ogaaday khalddadka soo socota:

- Waaxda Khasnadda ee Dowladda Jubbaland ma aysan samayn oo si joogto ah umaysan hayn Diiwaanka Akoonnada Bangiyada, kaas oo ka kooban faahfaahinta dhammaan akoonnada bangiyada ay Dowladda samaysatay oo ay maamusho, sida uu dhigayo xeerhosaadka lr.5 ee Habraacyada Maareynta Lacagta Caddaanka ah iyo Akoonnada Bangiyada
- Lama helin wax caddeyn ah oo muujinaysa in si joogto ah ama sannadkiiba mar dib-u-eegis iyo cusboonaysiin loogu sameeyo diiwaannada xisaabaadka bangiyada Dowladda, si loo hubiyo in dhammaan akoonnada bangiyada ee furan, xiran iyo kuwa cusub ee la sameeyey si habboon loo aqoonsado, loo diiwaangeliyo, loona hayo Diiwaanka Akoonnada Bangiyada.

Halista

- Maqnaanshaha Diiwaan Akoonnada Bangiyada oo dhammaystiran oo si joogto ah loo cusboonaysiiyey wuxuu keeni karaa in Waaxda Khasnaddu aysan haysan diiwaan lagu kalsoonaan karo oo dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan akoonnada bangiyada Dowladda.
- Tani waxay abuureysaa khatar weyn oo ah in akoon bangi la furo, la isticmaalo ama la xiro iyadoo aan loo marin oggolaanshaha iyo kormeerka habboon ee dowladda.

- Waxay sidoo kale kordhinaysaa khatarta ah in ay jiraan akoonno bangi oo aan la oggolaan ama aan la shaacin, kuwaas oo aan la aqoonsan, lala socon ama si habboon loogu soo sheegin diiwaannada Dowladda.

Talo soojeedin

- Maamulka waa inuu sameeyaa oo si joogto ah u hayaa Diiwaanka Akoonnada Bangiyada oo dhammaystiran oo casri ah, kaas oo daboolaya dhammaan akoonnada bangiyada Dowladda.
- Diiwaanka Akoonnada Bangiyada waa in si joogto ah dib loogu eego loona cusboonaysiiyo, si loo hubiyo in xogtu tahay mid dhammaystiran, sax ah oo casri ah, isla markaana dhammaan akoonnada bangiyada ee furan, xiran iyo kuwa cusub ee la sameeyey si habboon loo aqoonsado loona diiwaangeliyo.

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

5.0 Liidasho ka jirta habka wax-soo-iibsiga iyo qandaraasyadda dowladda

Halista	**Sare**

Halbeegga

Qodobka 24(1) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) ee Dowladda Jubbaland, 2017 wuxuu farayaa in dhammaan wax-iibsiyada badeecadaha iyo adeegyada laga helo alaab-qeybiyeyaasha, oo ay ku jiraan maalgashiyada raasumaalka ah, loo fuliyo si waafaqsan Xeerka Wax-soo-iibsiga Dadweynaha, 2015, sida wax-ka-beddelka lagu sameeyey iyo xeerarkiisa fulinta.

Sidoo kale, Qodobka 24(5) ee xeerka PFM, 2017 wuxuu dhigayaa in heshiisyada, intii ay suurtagal tahay, lagu daro qorshaha sannadlaha ah ee wax-soo-iibsiga ee wasaaradda, hay'adda ama wakaaladda ay khusayso, iyadoo la raacayo Xeerka Wax-soo-iibsiga Dadweynaha.

Xeerka No. 8, oo ka hadlaya Siyaasadaha iyo Habraacyada Wax-soo-iibsiga Dadweynaha, wuxuu qeexayaa hababka wax-soo-iibsiga iyo xuduudaha lacagaha ee lagu dabaqayo. Gaar ahaan:

- Qaybta 4.25.3 waxay dhigaysaa in Habka Wax-iibsiga Tooska ah ee Isbarbardhigga

Qiima-sheegashada (Shopping Method) loo adeegsan karo heshiisyada qiimahoodu yahay USD 10,000 ama ka yar, iyadoo la isbarbardhigayo qiime-soo-jeedinnada laga helo ugu yaraan saddex alaab-qeybiye ama qandaraasle, si loo hubiyo in la helo qiime tartan leh. • Qaybta 4.25.4 waxay dhigaysaa in Habka Hal Meel Wax-ka-iibsiga (Sole and Single Sourcing) uu yahay hab wax-soo-iib oo aan tartan ku salaysnayn, kaas oo loo adeegsan karo oo keliya xaaladaha gaarka ah ee xeerku qeexay. Mid ka mid ah xaaladahaas waa marka qiimaha heshiisku yahay USD 500 ama ka yar. Xeerku wuxuu si cad u mamnuucayaa in si ula kac ah shuruudaha ama baahiyaha wax-soo-iibsiga loogu kala jebiyo heshiisyo yaryar oo badan, iyadoo ujeeddadu tahay in heshiisyadu ku dhacaan xadka USD 500 • Sidaa darteed, wax-iibsiyada ka badan USD 500 ilaa USD 10,000, haddii aysan buuxin shuruudaha gaarka ah ee u oggolaanaya Habka Hal Meel wax-ka-iibsiga (Single sourcing), waa in guud ahaan lagu fuliyaa Habka qiime-sheegashada (Shopping) iyadoo la helayo ugu yaraan saddex qiime-soo-jeedin laguna sameynayo isbarbardhig qiime, si loo xaqiijiyo hufnaan, tartan iyo in dowladda ay ku hesho badeecadaha ama adeegyada qiime ku habboon. • Intaa waxaa dheer, Xeerka Lr. 8, farqadda 3.1, wuxuu dhigayaa in Dowladda Jubbaland inay diyaariso qorshayaal wax-soo-iibsi xilliyeed (muddo cayiman) oo ku saabsan soo-iibinta badeecadaha, hawlaha dhismaha, adeegyada la-talinta iyo adeegyada aan la-talinta ahayn. Farqadda 3.5 waxay sidoo kale dhigaysaa in wax-soo-iib aan la bilaabi karin haddii uusan jirin qorshe wax-soo-iibsi oo la ansixiyey. • Sidoo kale, farqadda 2.1 ee Xeerka Lr. 8, waxay dhigaysaa in dowladda Jubbaland ay yeelato Guddiga Wax-soo-iibsiga, kaas oo mas'uul ka ah dib-u-eegista habraacyada iyo dukumentiyada wax-soo-iibsiga Dowladda, qiimaynta qandaraasyada loo tartamay, talooyinka ku saabsan cidda heshiiska la siinayo iyo heshiisyada laftooda, si loo hubiyo in habka wax-soo-iibsigu u socdo si waafaqsan habraacyada iyo shuruudaha la dejiyey
Xaaladda Intii lagu guda jiray baarista wax-soo-iibsiga dowladda, Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu ogaaday gaabisyadan soo socda: **1. U hoggaansanaan la'aanta Hababka iyo Xuduudaha Wax-soo-iibsiga** Dib-u-eegistu waxay muujisay in qaar ka mid ah dhaqdhaqaaqyada wax-soo-iibsiga lagu

fuliyey habka Hal Meel Wax-ka-iibsiga (Single Sourcing), halka dukumentiyada iyo sababaynta loo baahanaa si loo caddeeyo adeegsiga habkan aan si buuxda loogu heli karin faylasha la baaray. Sidaa darteed, waxaa jirta baahi loo qabo in la sii xoojiyo dukumentaynta iyo sababaynta doorashada habka wax-soo-iibsiga.

Baaristu waxay sidoo kale muujisay in qaar ka mid ah macaamilada wax-soo-iibsiga aysan lahayn dukumentiyo taageeraya oo si buuxda u dhammaystiran. Dukumentiyada ay ka mid yihiin qiime-soo-jeedinnada, dalabaadka wax-iibsiga (purchase orders), heshiisyada, qaansheegyada (invoices), caddeynta keenista ama helitaanka badeecadaha iyo adeegyada, iyo oggolaanshaha khuseeya ayaa qaarkood aan si buuxda loogu heli karin faylasha la baaray.

2. Liiska Alaab-qeybiyeyaasha Hore loo Ansixiyey

Wasaaraddu ma aysan soo bandhigin liis casri ah oo alaab-qeybiyeyaasha iyo iibiyeyaasha hore loo ansixiyey (pre-qualified suppliers/vendors), sida ku xusan Siyaasadda Wax-soo-iibsiga Dowladda.

3. Guddiga Wax-soo-iibsiga

XHG wuxuu ogaaday in sannad-maaliyadeedkii 2025 aan dib Guddi Wax-soo-iibsiga dib u eegis lagu sameynin, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in la xoojiyo qaab-dhismeedka kormeerka iyo go'aan-qaadashada wax-soo-iibsiga.

4. Guddiga Wax-soo-iibsiga

XHG wuxuu ogaaday in sannad-maaliyadeedkii 2025 aan dib Guddi Wax-soo-iibsiga dib u eegis lagu sameynin, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in la xoojiyo qaab-dhismeedka kormeerka iyo go'aan-qaadashada wax-soo-iibsiga.

Halista

Waxaa jira khataro ay ka mid yihiin:

- U hoggaansanaan la’aanta shuruudaha wax-iibsiga waxay kordhinaysaa khatarta ah in wax-iibsigu noqdo mid aan tartan ku dhisnayn, qiimayaashuna si aan habboonayn u sarreeyaan iyo sidoo kale khiyaano, iskahorimaad dano iyo in dowladda aysan ka helin qiimaha iyo faa’iidada ku habboon lacagta ay bixisay (value for money).
- Maqnaanshaha dukumiintiyada iyo caddeymaha ku filan wuxuu xaddidayaa awoodda lagu xaqiijin karo in wax-iibsigu ahaa mid sax ah oo la oggolaaday iyo in badeecadihii ama adeegyadii la soo iibiyey dhab ahaan la helay

Talo soojeedin

Maamulka waa inuu:

- Dhaqan-geliyaa xuduudaha lacagaha iyo hababka wax-soo-iibsiga ee la ansixiyey, isla markaana hubiyaa in habka ku habboon si joogto ah loo adeegsado.
- Dalbadaa ugu yaraan saddex qiime-soo-jeedin, isla markaana la sameeyo isbarbardhig qiime oo si habboon loo diiwaangeliyey marka la adeegsanayo habka qiime-sheegashada (Shopping).
- Hubiyaa in dhammaan wax-soo-iibsiga lagu sameeyo Habka Hal Meel Wax-ka-iibsiga (Single Sourcing) ay leeyihiin sababayn ku filan, dukumentiyo dhammaystiran iyo oggolaanshaha mas'uulka ay khusayso.
- Hubiyaa in faylasha wax-soo-iibsiga iyo dhammaan dukumentiyada taageeraya ee khuseeya

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

6.0 Habacsanaanta Maareynta Amaahda Gudaha ee Dowladda

Halista	**Sare**

Halbeegga.

Qodobbada 38 iyo 42 ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) ee Jubbaland 2017 waxay farayaan Wasiirka inuu:

- Diyaariyo oo u gudbiyo Madaxweynaha iyo Baarlamaanka warbixinno lixdii biloodba mar, kuwaas oo ka hadlaya amaahda cusub, dammaanadaha, dib-u-bixinta deymaha, dib-u-habaynta jadwalka bixinta deymaha, deymaha laga cafiyey ama laga saaray diiwaanka, iyo xiritaanka waajibaadka deynta.
- Diyaariyo oo soo bandhigo warbixin ku saabsan deynta weli lagu leeyahay dowladda iyo saadaasha bixinta adeegga deynta ee muddada dhexe. (medium debt projection).
- Hubiyo in la sameeyo istaraatiijiyad maareynta deynta, si xilliyo joogto ah loo cusboonaysiiyo loona daabaco, taas oo qeexaysa shuruudaha iyo qawaaniinta amaahda cusub iyo sidoo kale amaahda iyo dammaanadaha ay Dowladda bixisay ama ay dammaanad qaaday.

Shuruudahan waxaa looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo hufnaan, isla-xisaabtan iyo maamul wax-ku-ool ah oo lagu sameeyo deynta dowladda iyo in si cad loola socdo waajibaadka maaliyadeed ee ka dhasha amaahda dowladda.

Xaaladda

Warbixinnada maaliyadeed ee sannadka 2025 waxay muujinayaan xaaladda amaahda gudaha ee Dowladda sida soo socota:

- USD 3,329,536 oo ah amaah cusub oo dowladda gudaha dalka ka qaadatay sannadka 2025
- USD 3,919,768 oo ah lacagihii dowladda dib ugu bixisay amaahdii gudaha intii lagu jiray sannadka 2025 iyo
- USD 8,995,963 oo ah haraagga amaahda gudaha ee dowladda weli lagu lahaa dhammaadka sannadka maaliyadeedkii ku dhammaaday 31 Diseembar 2025.

Iyadoo qayb ka ah habraacyadii baaritaanka, Xafiiska Hantidhawrka wuxuu fuliyey habraacyo lagu xaqiijinayo amaahda gudaha iyo dib-u-bixinnada amaahda ee lagu soo sheegay Warbixinta Amaahda Gudaha (Statement of Domestic Borrowing). Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu si faahfaahsan u baaray lacag dhan USD 3,062,722, taas oo u dhiganta qiyaastii 78% wadarta dib-u-bixinta amaahda gudaha, iyadoo diiradda la saaray dukumentiyada caddeymaha u aah shuruudaha dib-u-bixinta iyo habraacyada loo maray bixinta amaahdaas.

Dib-u-eegista dukumentiyada taageeraya waxay muujisay arrimaha soo socda:

- Lacag dhan **USD 246,816.00** waxaa lagu ogaaday in dukumentiyada taageeraya ay **qayb ahaan dhammaystirnayn**. Dukumentiyada la heli karay waxay u baahnaayeen in lagu dhammaystiro qaar ka mid ah caddaymaha la xiriira dib-u-bixinnada amaahda, sida dalabaadyada wax-iibsiga gudaha (Local Purchase Orders), heshiisyada, qaansheegyada iyo caddeymaha keenista ama helitaanka badeecadaha ama adeegyada, marka ay khuseeyaan.
- Lacag dhan **USD 295,448.00** ayaa lagu ogaaday in faylasha la heli karay aysan ku jirin dukumentiyo taageeraya oo ku filan oo lagu xaqiijin karo macaamilladaas.

Marka laga hadlayo **amaahda cusub ee USD 3,329,536** ee lagu diiwaangeliyey sannadka 2025, XHG wuxuu tilmaamay baahida loo qabo dukumentiyo dheeraad ah oo lagu xaqiijinayo isha amaahda, shuruudaheeda, oggolaanshaheeda iyo ujeeddada loo qaatay.

Halista

Habacsanaanta la ogaaday waxay abuuri kartaa khataraha soo socda:

1. In amaahda gudaha iyo dib-u-bixinnada amaahda oo aan la diiwaangelin ama si khaldan loo diiwaangeliyo.
2. In amaahda ay dowladda qaadato aan loo marin oggolaanshihii iyo habraacyadii loo baahnaa.
3. In xogta ku saabsan xaaladda amaahda ee dowladda si khaldan loogu soo bandhigo warbixinnada maaliyadeed.
4. In amaahda gudaha si aan sax ahayn ama aan dhammaystirnayn loogu soo sheego xisaabaadka maaliyadeed

Talo soojeedin

Maamulka waa inuu:

1. Hayaa Diiwaanka Deynta oo dhammaystiran oo si joogto ah loo cusboonaysiiyey, kaas oo ka kooban dhammaan amaahda gudaha, dib-u-bixinnada, haraagga deymaha iyo shuruudaha amaahda ee looga baahnaa.
2. Hubiyaa in dhammaan amaahda gudaha iyo dib-u-bixinnada amaahda si habboon loo oggolaaday, loo diiwaangeliyey, isla markaana lagu taageeray caddeymo iyo dukumentiyo ku habboon, iyo
3. Si joogto ah isu-waafajiyaa diiwaannada deymaha iyo warbixinnada maaliyadeed, iyadoo wixii farqi ah si degdeg ah loo baarayo loona saxayo
4. XHG wuxuu ku talinayaa in lacagaha deynta ah ee loo isticmaalo maalgelinta kharashaadka Dowladda lagu diiwaangeliyo madaxyada miisaaniyadda ee khuseeya, isla markaana si habboon loogu aqoonsado loona diiwaangeliyo inay yihiin deyn, si loo hubiyo in kharashaadka iyo waajibaadka deynta si sax ah uga muuqdaan diiwaannada maaliyadeed

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas’uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

7.0 U Hoggaansanaan La'aanta Shuruudaha Heshiiska-Shirkadda Adeegga Tayo-dhawrka ee Jubbaland (JCQS)

Halista	**Sare**

Halbeegga

Qodobka 4(2) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) wuxuu dhigayaa in dhammaan dakhliga ay Dowladda Jubbaland hesho ama loogu soo ururiyo magaca Dowladda si buuxda loo xisaabiyo, laguna shubo Sanduuqa Mideysan ee Dowladda (Consolidated Fund).

Qodobka 37(1) wuxuu sidoo kale dhigayaa in dakhliga Dowladda lagu shubo akoonka bangiga ee Dowladda ee loo asteeyey ee ku yaalla Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 30(7) wuxuu farayaa in dhammaan dukumentiyada la xiriira macaamilada maaliyadeed ee dadweynaha si habboon loo kaydiyo, loo hayo, loona ilaaliyo, iyadoo la raacayo xeerarka iyo habraacyada xisaabaadka ee khuseeya

Xaaladda

Shirkadda Adeegga Tayo-dhawrka Jubbaland (JQCS) waxay ku shaqaysaa heshiis dheef-wadaag (concession agreement) oo shan sano ah oo ay la gashay Dowladda Jubbaland, kaas oo bilaabmay sannadka 2025. Sida ku cad heshiiska, JQCS waxay mas'uul ka tahay kormeerka adeegyada xakamaynta tayada iyadoo wakiil ka ah Dowladda iyo ururinta dakhliga la xiriira adeegyadaas.

Sida ku cad shuruudaha heshiiska, dakhliga la ururiyo waxaa loo qaybiyaa JQCS iyo Dowladda iyadoo loo eegayo saamiga 88%–12%, iyadoo saamiga 12% ee Dowladda looga baahan yahay in si toos ah loogu shubo koontada bangiga ee loo asteeyey Dowladda Jubbaland.

Iyadoo qayb ka ah habraacyadii baaritaanka, waxaan dib-u-eegis ku samaynay heshiiska dheef-wadaagga, waraaqaha dhigaalka lacagaha (deposit slips), iyo dukumentiyada caddeynaya lacag-bixinta ee JQCS soo gudbisay, ilaa 31 Diseembar 2025.

Caddeymihii baaritaanka ee la helay waxay muujinayeen in JQCS ay lacag ku shubtay koontada bangiga Dowladda. Hase yeeshee, lacagahaas kuma jiraan diiwaannada maaliyadeed ama warbixinnada maaliyadeed ee Wasaaradda muddadii la baarayey.

Kadib, Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHG) wuxuu Wasaaradda ka codsaday macluumaad ku saabsan dakhliga ay JQCS ururisay iyo lacagihii lagu shubay koontada Dowladda. Maamulka wuxuu sheegay in, sida ku cad diiwaannadiisa, JQCS aysan wax dakhli ah ku shubin koontada Dowladda muddadii la baarayey. Arrintani waxay ahayd mid aan waafaqsanayn caddeymaha dhigaallada bangiga ee ay JQCS soo gudbisay.

JQCS, dhankeeda waxay sheegtay in wadarta dakhliga ay ururisay sannadkii 2025 ay ahayd USD 195,004.30. Iyadoo lagu salaynayo saamiga Dowladda ee 12%, xaqa Dowladda ee dakhligaas wuxuu ahaa USD 23,400.57, taas oo JQCS ay sheegtay inay ku shubtay koontada bangiga Dowladda. Hase yeeshee, XHG wuxuu awoodi waayey inuu si madax-bannaan ugu waafajiyo dakhliga ay JQCS sheegtay inay ku shubtay koontada bangiga dowladda iyo warbixinnada maaliyadeed ee Wasaaradda iyo dukumentiyada taageeraya ee ay JQCS soo gudbisay. Sidaa darteed, XHG wuxuu awoodi waayey inuu helo caddeymo baaritaan oo ku filan kuna habboon si uu si madax-bannaan ugu xaqiijiyo dhammaystirnaanta iyo saxnaanta saamiga 12% ee dowladda ee heshiiska ku waajibinayo, kaas oo ka soo baxa dakhliga ay JQCS ururiso

Halista

- Maqnaanshaha is-waafajinta diiwaannada dakhliga ay JQCS ururisay, dhigaallada bangiga iyo diiwaannada xisaabaadka Wasaaradda wuxuu kordhinayaa khatarta ah in dakhliga Dowladda uu lumo, aan si dhammaystiran loo diiwaangelin, ama si khaldan loogu soo bandhigo warbixinnada maaliyadeed.
- Waxay sidoo kale abuureysaa khatar ah in saamiga 12% ee Dowladda ee heshiisku dhigayo aan si buuxda loo xisaabin, loo aqoonsan, ama loo soo ceshan.

Talo soojeedin

- Waa in la xoojiyaa xakameeyayaasha dakhliga laga ururiyo heshiisyada dheef-wadaagga iyo hababka dakhliga la wadaago, iyadoo la sameynayo hannaan rasmi ah oo lagu waafajiyo diiwaannada dakhliga ee shirkadda heshiiska haysata, dhigaallada koontada bangiga Dowladda iyo diiwaannada xisaabaadka Wasaaradda.
- Sidoo kale, waa in la hubiyaa in dhammaan lacagaha Dowladda uga soo baxa heshiiska dheef-wadaagga si buuxda loo xisaabiyo, si sax ah loo diiwaangeliyo, isla markaana si habboon loogu soo bandhigo warbixinnada maaliyadeed. Wasaaraddu waa inay sidoo kale haysaa dukumentiyo taageeraya oo ku filan kuna habboon, si si madax-bannaan loogu xaqiijin karo saamiga iyo xaqa heshiiska ah ee Dowladda.

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

8.0 U Hoggaansanaan La'aanta Shuruudaha Heshiiska ee shirkadda midnimo

Halista	**Sare**

Halbeegga

Sida ku cad heshiiska kirada ee u dhexeeya Dowladda Jubbaland iyo Shirkadda Midnimo, shirkaddu waxaa waajib ku ah inay bixiso kirada bil kasta oo dhan USD 500, taas oo ku saabsan isticmaalka hantida Dowladda ee heshiiska loogu kireeyey.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 4(2) ee xeerka PFM wuxuu dhigayaa in dhammaan dakhliga ay Dowladda Jubbaland hesho ama loogu soo ururiyo magaca Dowladda si buuxda loo xisaabiyo, laguna shubo Sanduuqa Mideysan ee Dowladda (Consolidated Fund). Qodobka 30(7) wuxuu sidoo kale dhigayaa in dukumentiyada la xiriira macaamilada maaliyadeed ee dadweynaha si habboon loo xareeyo, loo kaydiyo loona ilaaliyo.

Sidaa darteed, dakhliga kirada ee dowladda xaqa u leedahay waa in loo ururiyaa si waafaqsan shuruudaha heshiiska kirada, si habboon loogu sameeyaa rasiidh, loo diiwaangeliyo, looguna shubo koontada dowladda ee loo asteeyey. Sidoo kale, waa in la hayaa diiwaanno ku filan oo taageeraya lacagaha la rabay in la bixiyo, kuwa la ururiyey iyo kuwa lagu shubay koontada dowladda.

Xaaladda

Intii lagu jiray baaritaanka, XHG wuxuu dib-u-eegis ku sameeyey heshiiska kirada ee u dhexeeya Dowladda Jubbaland iyo Shirkadda Midnimo, kaas oo ku saabsan isticmaalka hanti Dowladda leedahay oo loogu talagalay in ay noqoto xarun dhallinyaro.

Sida ku cad heshiiska kirada, Shirkadda Midnimo waxaa waajib ku ah inay Dowladda Jubbaland siiso kirada bil kasta oo dhan USD 500. Dib-u-eegistii heshiiska kirada iyo diiwaannada lacag-bixinta ee la heli karay waxay muujisay in kiradii bilaha ahayd ee lagu heshiiyey aan dowladda la siin muddadii saddexda sano ahayd.

Iyadoo lagu salaynayo kirada heshiiska ku xusan ee ah USD 500 bishii, dakhliga kirada ee Dowladda ka maqan muddada saddexda sano ah wuxuu dhan yahay USD 18,000 waxaana loo xisaabiyey sidan soo socota:

Description	Amount
Monthly lease rental	500 USD
Number of months	36 months
Total lease revenue due	18,000

Halista
• Ku guuldarreysiga in la ururiyo dakhliga kirada ee Dowladda xaqa ugu leedahay sida ku cad heshiiska wuxuu sababayaa in dakhliga Dowladda uu lumo ama aan si buuxda loo soo ururin, wuxuuna wiiqayaa isla-xisaabtanka iyo maareynta hantida Dowladda ama hantida ay dowladda kiraysatay. • Sidoo kale, arrintani waxay muujinaysaa u hoggaansanaan la'aanta waajibaadka lacag-bixineed ee heshiiska, taas oo keeni karta in dowladda aysan soo ururin dakhli ay sharci ahaan iyo heshiis ahaan xaq ugu leedahay.
Talo soojeedin • Maamulka maaliyadda waa inuu hubiyaa in Shirkadda Midnimo ay bixiso lacagta kirada ee Dowladda ka maqan oo dhan USD 18,000, iyadoo la raacayo shuruudaha heshiiska kirada. Sidoo kale, waa in la hubiyaa in kirada billaha ah ee mustaqbalka lagu bixiyo waqtigii loogu talagalay, si habboon loo diiwaangeliyo, looguna shubo akoonka Dowladda ee loogu talagalay. • Maamulka maaliyadda waa inuu sidoo kale si joogto ah ula socdo hirgelinta heshiiska kirada, si loo hubiyo in si buuxda loogu hoggaansamo shuruudaha heshiiska iyo in Dowladda ay hesho faa'iidada iyo dakhliga loogu talagalay isticmaalka hantideeda.
Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

9.0 Habacsanaanta Maareynta Hantida Ma-guurtada ah ee Dowladda

Halista	**Sare**

Halbeegga

Qodobka 6(2) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) wuxuu Wasiirka u xilsaarayaa mas'uuliyadda maareynta iyo ilaalinta hantida Dowladda, oo ay ku jiraan hantida ma-guurtada ah iyo hantida maaliyadeed, iyadoo la raacayo shuruudaha Xeerka

Xaaladda

Iyadoo qayb ka ah baaritaanka, XHG wuxuu qiimeeyey xakameeyayaasha lagu maamulo diiwaangelinta, ilaalinta iyo maareynta hantida Dowladda.

XHG wuxuu Wasaaradda ka codsaday inay soo gudbiso Diiwaanka Hantida (Asset Register) oo dhammaystiran si baaritaan loogu sameeyo. Hase yeeshee, Wasaaraddu ma aysan soo gudbin Diiwaanka Hantida ama diiwaan kale oo dhammaystiran oo ka turjumaya hantida Dowladda.

Sidaa darteed, XHG wuxuu awoodi waayey inuu xaqiijiyo in hantida Dowladda si dhammaystiran loo diiwaangeliyey, si habboon loo aqoonsaday, jiritaan ahaan loo xaqiijiyey, si ku filan loo ilaaliyey, isla markaana si wanaagsan loo dayactiray. Gaar ahaan, maqnaanshaha Diiwaan Hanti oo dhammaystiran wuxuu XHG ka hor istaagay inuu xaqiijiyo jiritaanka, lahaanshaha, dhammaystirnaanta iyo xaaladda hantida Dowladda.

Halista

Maqnaanshaha Diiwaanka Hantida Dowladda wuxuu kordhinayaa khataraha soo socda:

- In hanti dowladda leedahay ay lunato, si khaldan loo isticmaalo ama laga takhaluso iyadoo aan la haysan oggolaanshaha loo baahan yahay.
- Isla-xisaabtanka iyo la socodka hantida Dowladda oo daciifa, maadaama aan si cad loo hayn xogta ku saabsan hantida Dowladda iyo cidda mas'uulka ka ah.

Talo soojeedin

Maamulka waa inuu:

- Sameeyaa oo si joogto ah u hayaa Diiwaan Hantiyeed oo dhammaystiran, kaas oo muujinaya dhammaan hantida Dowladda iyo xogta muhiimka ah ee la xiriirta.
- Hubiyaa in hantida Dowladda lagu dhejiyo summado aqoonsi (asset tags), isla markaana si joogto ah loo tiriyo loona xaqiijiyo jiritaankeeda iyo xaaladdeeda.
- Si joogto ah ugu waafajiyaa Diiwaanka Hantida Dowladda iyo xogta asalka ah ee hantida, si loo hubiyo in xogtu tahay mid sax ah oo dhammaystiran.

Jawaabta maamulka iyo tallaabada la qaadayo

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

10.0 Gaabisyada ka jira Hantidhawrka Gudaha

Halista	**Sare**

Halbeegga

Qodobka 34(2) iyo (3) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Dadweynaha (PFM Act) wuxuu qeexayaa waajibaadka iyo shaqada Hantidhawrka Gudaha, oo ay ka mid yihiin qiimeynta iyo

hubinta nidaamyada xakamaynta gudaha iyo maamulka maaliyadeed. Sidoo kale, Qodobka 34(4) ee Xeerka maamulka maaliyadda wuxuu si cad u dhigayaa in warbixinnada Hantidhawrka Gudaha loo soo bandhigo Xafiiska Hantidhowrka Guud, si Xafiiska Hantidhowrka Guud uu qayb uga dhigo qiimeyntiisa ku saabsan xakamaynta gudaha ee warbixinta maaliyadeed, oo ay ku jirto qiimeynta waxtarka iyo shaqada Hantidhawrka Gudaha.
Xaaladda Intii lagu guda jiray baarista, Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxa uu qiimeeyey shaqada Hantidhawrka Gudaha ee Wasaaradda, waxaana lagu ogaaday halisyo waaweyn oo wiiqaya awoodda Hantidhawrka Gudaha uleeyahay in uu si wax-ku-ool ah uga bixiyo hubin ku saabsan maareynta maaliyadda iyo nidaamyada xakamaynta gudaha ee Wasaaradda. Halisaha la ogaaday waxaa ka mid ahaa: • Ma jirin Guddi Hantidhawr Gudaha oo loo sameeyey in uu bixiyo kormeer, hagid iyo taageero ku saabsan shaqada Hantidhawrka Gudaha. • Ma jirin axdi Hantidhawrka Gudaha oo la ansixiyey, kaas oo qeexaya waajibaadka, awoodda, mas'uuliyadaha iyo habka ay warbixinnadu uga soo baxayaan Hantidhawrka Gudaha. • Ma jirin Qorshe Sannadeedka Shaqada Hantidhawrka Gudaha oo la ansixiyey, kaas oo muujinaya sida hawlaha iyo baaxadda baarista Hantidhawrka Gudaha loo qorsheeyey iyadoo lagu salaynayo halisaha la aqoonsaday. • Wax warbixinno Hantidhawr Gudaha ah looma soo gudbin XHG sannadka la baarayey, taasoo ka dhigan in Xafiiska Hantidhawrka Guud uusan helin warbixinno ama dukumiinti muujinaya shaqadii Hantidhawrka Gudaha iyo hubintii uu qabtay muddadaas. Guud ahaan, halisahani waxay muujinayaan in Hantidhawrka Gudaha ee Wasaaraddu uusan ku shaqayn nidaam maamul iyo kormeer oo ku filan, qorshe habboon, dukumiinti iyo warbixinno ku filan, iyo agab ku filan si uu u bixiyo hubin wax-ku-ool ah oo ku saabsan ku filnaanshaha iyo waxtarka nidaamyada xakamaynta gudaha ee Wasaaradda.
Halista Halisahan waxay kordhinayaan waxyaabaha soo socda: • In wax-is-daba-marin maaliyadeed dhacda. Halisaha maaliyadeed iyo kuwa hawleed oo aan waqtigooda la aqoonsan lana sixin, taas oo hoos u dhigaysa waxtarka nidaamka xakamaynta gudaha iyo isla-xisaabtanka Wasaaradda.

Talo soojeedin Maamulka waa inuu xoojiyaa shaqada Hantidhawrka Gudaha isagoo: • Sameynaya hannaan ku filan oo kormeer iyo hagid ah oo si joogto ah ula socda shaqada Hantidhawrka Gudaha • Diyaarinaya oo ansixinaya Axdiga/sharciga Hantidhawrka Gudaha (Internal Audit Charter) iyo qorshe sannadeed shaqo oo ku salaysan qiimeynta khataraha (risk-based annual work plan).
Jawaabta maamulka iyo wax qabadka

Faallada maamulka iyo caddeynta cusub	
Mas'uulka fulinta	
Muddada / taariikhda fulinta	

11.0 Dabagalka hore ee talooyinka warbixinta hantidhawrka iyo xaaladda fulintooda (Xafiiska Hantidhawrka Guud Wasaaradda Maaliyadda)

16 ka mid ah 17-dii talo-bixin ee hantidhawrka bixiyey sannadkii hore ayaan weli la fulin iyadoo la gaaray hantidhawrka Sannad-Maaliyadeedka 2025 (FY2025). Talo-bixinta keliya ee la fuliyey waxay ahayd xaashiyaha xaadirinta shaqada (timesheets) ee macallimiinta iyo shaqaalaha caafimaadka, sida hoos lagu soo koobay.

No.	Area/Issue	Status
1	Gaabisyada ka jira dukumentiyada ururinta dakhliga ($4.19M oo aan lahayn dukumenti taageeraya)	**Lama fulin**
2	Habka gacanta lagu maamulo ururinta dakhliga	**Lama fulin**
3	Dib-u-eegista heshiiska shirkadda JQCS ee dheef-wadaagga dakhliga ah	**Lama fulin**
4	Lacagihii kirada ee aan la bixin (Midnimo, Eagle Risk Mgmt)	**Lama fulin**
5	Isbeddellada dakhliga / dib-u-eegista iyo falanqaynta dakhliga	**Lama fulin**
6	Kala-duwanaanshaha miisaaniyadda (32%) / u hoggaansanaan la'aanta shuruudaha sanduuqa xaaladaha lama filaanka ah	**Lama fulin**

No.	Area/Issue	Status
7	Gaabisyada ka jira diiwaangelinta iyo warbixinta deymaha	**Lama fulin**
8	Diiwaanka koontooyinka bangiyada / dib-u-eegista sannadlaha ah	**Lama fulin**
9	Inta jeer ee la sameeyo iswaafajinta warbixinnada bangiyada	**Lama fulin**
10	Dukumentiyada taageeraya kharashaadka ($1.17 milyan oo aan lahayn dukumentiyo taageeraya)	**Lama fulin**
11	Xaashiyaha xaadirinta shaqaalaha oo aan laheynin-macallimiinta iyo shaqaalaha caafimaadka ($252,044.74 oo aan lahayn xaashiyaha xaadirinta shaqaalaha)	**La fuliyey**
12	Dukumentiyada taageeraya kharashaadka waaxda amniga ($4.04 milyan oo aan lahayn dukumentiyo taageeraya)	**Lama fulin**
13	Ku-xadgudubyo ka dhan ah siyaasadda wax-iibsiga	**Lama fulin**
14	Diiwaanka hantida oo aan si joogto ah loo ilaalin	**Lama fulin**
15	Habacsanaanta ka jira shaqada hantidhawrka gudaha (guddi, axdi-hawleed, qorshe shaqo iyo warbixinno oo aan jirin)	**Lama fulin**
16	Habacsanaanta ka jira xakameeyayaasha ICT-ga (no strategic plan, DR plan, access register, SLA, fire safety)	**Lama fulin**
17	Warbixinnada hantidhawrka gudaha oo aan loo gudbin Hantidhawrka Guud	**Lama fulin**

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

OFFICE OF THE AUDITOR GENERAL

JUBALAND STATE OF SOMALIA

DOWLADDA JUBBALAND